JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOMALIA

Wasaaradda shaqada iyo Arrimaha Bulshada

Waaxda dhaqancelinta iyo daryeelka naafada

SIYAASADDA NAAFADA QARANKA SOOMAALIYEED

Nuqulkii Kowaad

Septembar

10/09/2015

TUSMADA

LIISKA ERAYADA IYO WAXA AY U GAABSAN YIHIIN 4

MAHADNAQ 5

CUTUBKA 1: HORDHAC 10

1.1. Aragtiyaha kala Duwan ee Naafada 11

1.2.Ujeeddooyinka iyo Hadafka Siyaasadda 13

1.3.Raad-Raac (Background) 14

1.4. Adeegyada jira ee Naafada 17

1.5. Xalaadaha Heer Caalami ah 19

2.1. Caqabadaha iyo Fahamka Khaldan

2.2. Caqabadaha Dhinaca Adeegga: Awood dhisidda Tababbar (Capacity Building) 23

2.3. Kooxaha Mudan 24

Cutubka 3: QAYBAHA SIYAASADAN 25

3.1.Ka hortagidda Naafonimada 26

3.2. HORE U GARASHADA NAAFONIMADA IYO WAX KA QABADKEEDA 28

3.3. ABUURISTA WACYIGELINTA 29

3.4. DHAQAN CELIN (REHABILITATION) 33

3.5. Waxbarashada gud 34

3.6.CAAFIMAADKA 35

3.7. Awoodid Isticmaal oo aan Caqabad lahayn (Accesibility)

3.8. Tababarrada iyo shaqaaleynta

3.9.1. Haweenka Naafada ah: 39

3.9.2. Carruurta Naafada:
40

3.9.3. Dadka da'da ah ee Naafada: 40

3.9.4. Dadka leh naafanimada kala duwan:
41

3.10. HIV/AIDS IYO NAAFANIMO 41

3.11. Xuquuqda Bini'adamka iyo ilaalinta sharciga 42

3.12. URURADA DADKA NAAFADA IYO URRURADA AAN DAWLIGA AHAYN 45

3.12.1. Urrurada Dadka Naafada (DPOs) 45

3.12.2.Horumarinta Ururada Naafada u adeega 45

CUTUBKA4: MASUULIYADDA IYO MASUULIYADAHA FULINTA SIYAASADDAN EE KA QAYB QAATAYAASHA
4.1 Dawladda dhexe (WAQ&HB IYO WASAARADAHA KALE) 48

4.2.Golaha Naafada Qaranka 49

4.3. Dawladaha Hoose (dawladaha hoose iyo xafiisyada dawladda ee goboladda): 49

4.4. Qoysaska/tuulooyinka/ Bulshada 50

4.5. Ururada aan dawliga aheyn 50

Lifaaq 1: Qeexid. 50

LIISKA ERAYADA IYO WAXA AY U GAABSAN YIHIIN

- AIDS Acquired Immuno-Deficiency Syndrome
- AET Africa Educational Trust
- ANDP Activist Network for Disabled Person
- CBR Community Based Rehabilitation
- DPOs Disabled People's Organizations
- DRC Danish Refugee Council
- HI Handicap International
- HIV Human Immuno-Deficiency Virus
- IAS International Aid Service
- IDPs Internally Displaced Persons
- MOE Ministry of Education
- MOHD Ministry of Human Development
- MOH Ministry of Health
- NGOs Non-Governmental Organization
- PHC Primary Health Care
- SHRC Somalia Human Rights Commission
- SDO Somalia Disability Organisation
- SASE Somalia Special Education Association
- TBAs Traditional Birth Attendants
- UN United Nations
- UNICEF United Nation's Children Fund
- WHO World Health Organization
- FSDU Forum for Somali Disabled Union

- **MAHADNAQ**

Waxaa sharaf noo ah in aan idin soo hordhigo siyaasada naafadda ee qaranka Somalia. Sida ku cad ***Dastuurka Qaranka ee*** Somalia wuxuu cadeynayaa sinaan, xorriyad, cadaalad iyo sharafta dadka oo dhan iyadoo dastuurku inna faraayo bulshda dhammaanteed isla jaanqaadida oo aan faquuqid lahayn marka lagu daro xataa kuwa naafada ah.waa arrin lagu cabbiri karo sida ummadi u tixgeliso xuquuqul insaanka iyo niyad wanaagga ummaddaas waxay tahay sida ay u eegaan ulana dhaqmaan dadka naafada ah, oo ay bulshadeenu muddo dheer caqabado noloshoodii ka dhigay mid si aan caddaalad ahayn ugu tiirsan dadka kale, mid takoor leh, oo goonni meelo gaar ah loogu faquuqayo oo aan bulshada inay dhex galaanna laga caawinaynin.

Siyaasadan Naafadu waxay markhaati u tahay sida ay uga go'aan tahay dawladda inay soo bandhigto siyaasad ku wajahan awoodsiin iyo sidii ay dadka naafada ahi bulshada dib uga mid noqon lahaayeen ee u dhexgeli lahaayeen. Dhamaystirka siyaasaddan Naafadu waxay soo martay marxalaado kala duwan oo ahaa talo bixin, sida shirar wada-tashi oo la isugu yimi oo talooyin lagaga bixiyey, kuwaas oo ay ka qayb galeen Wasaaraddaha dawladda, dadka naafada ah, ururadda dadka naafada ah, ururrada bulshada rayidka ah iyo cid allaale iyo ciddii kale ee ka qayb noqon karta Siyaasadda Naafada. Shirarkan Wada tashiyadda kala duwan waxaa ka qayb qaatay xubno metelaaya gobolaadda dalka oo dhan.

Dawladdu hore ayay u muujisay sida ay uga go'an tahay in xaalad nololeedka ku hareeraysan naafada in wax laga qabto, iyadoo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadu ay samaysay Waaxda dhaqancelinta iyo daryeelka Naafada Waa in aynu awooddeena oo dhan isugu geynaa sidii ay u rumoobi lahayd in adeegyo dheeraad ah iyo fursado kala duwani ugu fududaan lahaayeen dadka naafada ah si ay si siman wax ula qaybsadaan bulshada inteeda kale.

Ayado oo aynu nahay bulsho aan is takoorin, waa in aynu aqoonsannaa in dadkeena naafada ah ay helaan xuquuq la siman tan dadka kale; waana in aynu ogaannaa in masuuliyadi inaga wada saaran tahay kor u qaadida iyo hagaajinta duruufaha nololeedka dadka naafada ah.

Cilmi-Baadhistii ugu dambaysay ee ay sameeyeen ururka caafimaadka adduunka iyo Baanka Adduunka (2011, WB and WHO) ayaa waxay tilmaamaysaa in bulsho kasta qiyaas ahaan 15.3-15.6% dadkeeda ka mid ahi ay leeyihiin naafonimo heerar kala duwan iyo noocyo kala duwan ah. Tirada dadweynaha guud marka la eego 2.2-2.9% ayaa leh naafonimo culus. Mar haddii Somaliya ayna weli samayn macluumaad tirakoob ku salaysan, waxan qiyaas u qaadan karnaa tirakoobka caalamka, oo u dhigma in qiyaastii inta u dhexaysa **535,000** iyo **546,000 (15%)** oo dad naafonimo lihi ay ku nool yihiiin Somalia.

Dadka naafada ah ee Somalia badankoodu ma helaan adeegyada kooban ee waddanka ka jira.

Waxa intaas sii dheer iyadoo ay dhammaan ka hor yimaaddaan caqabado iyo fursado la'aan si ay bulshada uga qayb qaatan si la siman dadka kale.

Haya'dda Shaqaalaha Adduunka (ILO) ayaa waxay maalgelisay daraasad ku saabsan raadka bulshada takoorta dadkeeda naafada ah.

Waxay daraasaddaasi daahfurtay in habdhaqanka takoorku, celcelis ahaan ka lumiyo waddan kasta inta u dhexaysa 3-5% dakhliga wax soo saarka oo ay sabab u tahay haddii qaabka waddankaas ee bulsho ama dhaqaale aanay naafadu qayb ka ahayn ama adeegyada aanay naafadu ka qayb gelin sida waxbarashada, caafimaadka, gaadiidka iyo lacagta (ILO, 2009). Taas macneheedu wuxuu noqonayaa inaynu dhihi karno Somalia lafteeda waxa ka khasaaraya oo ka lumaya tiro-baaxad weyn oo karti iyo waxqabad leh taas oo ay sabab u tahay haddii aan tacab la gelin bulshada, dhaqaalaha, iyo siyaasadda si adeegyada bulshada iyo nolosha qaybeheeda kaleba looga dhigo mid dadku wada isticmaali karaan oo aan takoor lahayn. Iyadoo tirada intaas le'eg ee dadka naafadda ahi ay jirto, haddana aad ayey u kooban yihiin adeegyada iyo fursadaha jira ee ay leeyihiin dadka naafadda ahi si ay ula mid noqdaan bulshada inteeda kale.

Dareenka ah baahida loo qabo Siyaasad Dawladdeed oo hagta qorshaha lagu wajahayo baahiyaha iyo arrimaha dadka naafadda ah ayaa ahaa mid muddo sannado ah jiray, loona arkaayey lagama maarmaan.

Siyaasaddan Qaran oo hagta qorshaha waxqabadka ee lagu baahinayo naafada si wax looga qabto, waa arrin muddo sannado ah dareenkeedu taagnaa oo loo arkaayey lagama maarmaan. Siyaasaddan Qaran ee Naafada ee la soo bandhigay waxaa loogu talagalay inay hagto qorsheynta, fulinta iyo qiimaynta siyaasaddaha mustaqbalka ee dawladda, shuruucda iyo qorshaha qaranka ee

wax-qabadka naafada si loo xaqiijiyo in naafadu ay si macno-leh uga qayb qaadato bulsha-weynta Somalia.

Siyaasadan waxay soo bandhigaysaa baahiyaha kala duwan ee dadka naafada ah iyo sidii baahiyahaas kala duwan wax looga qaban lahaa iyadoo loo raacaayo qaab ah inay naafadu xaq u leeyihiin oo ay xuquuqdoodii ka maqnayd helaan; isla markaana loo famhi laha caqabadaha naafonimada keenaaya ee ka hortaagan naafadu inay bulshada si buuxda uga mid noqdaan oo wax ula qabsadaan. Siyaasaddani waxay ujeeddadeedu tahay inay tusaallayso waxyaalaha muhiimka ah ee bulshadeennu u baahan tahay inay qabato si ay u noqoto bulsho laga wada qayb-noqdo iyo sidoo kalee waxqabadka ku salaysan xuquuqul-insaanka ee sidii arrimahaas wax looga qaban lahaa; iyo sidii loo garan lahaa caqabadaha abuura xaalado keenaya naafanimo ee dadka naafada ah u diidaaya inay si buuxda uga qayb qaataan ugana mid noqdaan bulshada inteeda kale.

Naafadu waa muwaadiniin innagoo kale ah, waxaana la soo gaaray wakhtigii lajoojin lahayn in naafada loo arko dad aan wax qabsan Karin oo masaakiin ah-meeshii loo arki lahaa dad wax qabsan kara oo bulshada ay ku dhex nool yihiinna wax badan horumarkeeda ku soo kordhin kara.

Si looga miro dhaliyo waxyaalaha fiican ee siyaasaddani xambaarsan tahay, Waxa jira kheyraad farabadan iyo aqoon loo adeegsan karo sidii wax looga beddeli lahaa fikirka iyo habdhaqanka iyo aragtida ku wajahan sidii bulshadeenna looga wada qayb qaadan lahaa ee aan cidna looga tageen. Waxaan u soo jeedinayaa dhammaan cid kasta oo ay khusayso siyaasaddani siiba dadka naafada ah laftooda, bulshadeenna Somalia, iyo beesha caalamkaba inay is garab taagaan oo gacmahana laysu qabsado si loo xaqiijiyo in mirihii muddada dheer la sugaayey ee siyaasaddan la gaaray.

Dokumentigani waa dokumenti nool, oo dib loo akhrin doono marmar kale, iyadoo marba wixii cusubna lagu kordhin doono si uu uga turjumo waxyaalaha ku soo kordha arrimaha naafada.

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay sidoo kale u mahad celinaysaa dhammaan ka soo qaybqaatayaashi sameynta Siyaasada naafada oo ay ka mid yihiin, Sarakiisha Wasaaraddaha kala duwan, khubarada ku xeesha dheer arrimaha naafada iyo ururadda maxaliga ah ee ku hawlanaa horumarinta dadka naafada oo dhamaantood ka soo qayb qaatay oo ku darsaday wixii oraah, fikir iyo soo jeedin ah oo ay hayeen si loo soo saaro Siyaasada Naafadda qaranka oo dhameystiran.

Waxaa sidoo kale ay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ay u mahad naqaysaa hay'adaha Caalamiga ah ee fara ku tiriska ah ee taageerada u fidiyey barnaamijyada arrimaha dadka naafada ah

Mudooyinkii u dambeyey. Haya'dahaasi Waxay kala ahaayeen: ***AfricaEducational Trust (AET) iyo Abilis Foundation-Finland)***. Isla markaa waxaan fursadan uga fa'iideysanaynaa in aan ku guubaabino haya'daha caalamiga ah iyo kuwa qaramada midoobay u heelanaashaha arrimaha dadka naafadda ah inay ku darsadaan barnamijyadooda horumarineed.

Waaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada , oo soo diyaarisay siyaasada naafada qaranka Soomaaliyeed waxay umahad celinaysaa guud ahaan aqoonyahan nadii nagu gacansiiyay samaynta iyo dhameystirka Siyaasada naafada Qaranka , waxaa sidaas si lamid ah ugu mahad celinaynaa guud ahaan ka soo qeyb galayaasha sameynta siyaasadda naafada qaranka soomaaliyeed ,

Wasiirka Wasaarada Shaqada iyo Arimaha Bulshada

Mudne Cabdiwali Ibraahim Sheekh Muuday

Septembar, 2015

- **CUTUBKA 1: HORDHAC**

Siyaasadani waxay ka kooban tahay khibradaha gudaha iyo dibadda oo laysu keenay ayadoo markaa lagu saleeyay dadaalada caalamiga ah ee arrimaha naafada. Waxay siyaasaddani ka shidaal qaadatay oo hagay heshiiska caalamiga ah ee dhowaan Qaramada midoobay ansixisay ee xuquuqda dadka naafada ah iyo tobanka sano ee Afrika u goysay in arrimaha naafada wax lagaga qabto (2010- 2019).

Ma jirto warbixin rasmi ah oo ka soo baxday noocyada iyo tirada guud ee naafada ku nool Soomaaliya sababto ah wax tiro koob qaran ah oo ilaa hadda lagu sameeyay ma jiraan. Taasi waxay caqabad ku tahay samaynta siyaasad ku fadhida daraasad la sameeyey. Hase yeeshee waxa innaga caawinaaya qorshaynteenna marka aan isticmaallo qiyaasaha caalamka kale isticmaalo. Qorsha ah in tirakoob iyo xog la soo ururiyo ee qaybta ka ah qorshaha horumarinta qaranka 2015-2020 waa fursad weyn oo caqabadda xog la'aanta

lagaga bixi karo. Sanaddihii badnaa ee ay soo jireen dagaaladu darteed, ayaa naafanimadu noqotay mid la xiriirsan dagaalka.

Naafada baskiilada isticmaasha (Wheelchair users) ayaa iyaguna noqday koox kale oo magicii naafada oo dhan loo xambaariyey ama noqday kooxda naafo loo yaqaanno. Si kale haddi aynu u eegno, naafada jirka ayaa ahmiyad laga siiyey marka loo eego tusaale ahaan Indhoolaha, dhegoolaha iyo naafada maskixiyanka ahba. Naafada jidhka ayaa tixgelin dheeraad ah la siiyaa marka loo eego tusaalle ahaan naafada indha, ama dhegaha, ama garaadka iyo maskaxda, ama naafada hadalka.

Somalia dadkeeda naafada ah waxaa ku xiriirsan midab takor iyo faham khaldan oo lgahaysto. Dadka naafada ah waxaa loo arkaa masaakiimo in laga naxo mudan,iyo inay ku tiirsanaadaan dadkale ay tahay oo aan loo qiimaynin sidii qayb ka mid ah bulshada ay ku dhex nool yihiin.

Iyadoo ay sabab u tahay arrimo bay'adda la xiriirta sida gaadiidka oo aanay kori Karin, dadka oo fikrado khaldan ka qaba, afka dhagoolaha oo aan la isticmaalin, waxbarashada loo dhan yahay oo aan aqoon fiican loo lahayn, dadka naafada ahi waxay noqdeen qaar laga saaray bulsho weynta soomalida xuquuqdii aasaasiga ahaydna ma helaan. Sidaas darteed, cilmi baadhistu waxay caddaysay in xiriir weyni ka dhexeeyo naafanimada iyo faqiirnimada: faqrigu wuxuu dadka u nugleeyaa in naafonimo haleesho oo caqabaadka la xiriirsan ay la kulmaan, sidoo kale qofka naafada ahi
wuxuu u nugulyahay inuu faqiir noqdo isaga iyo qoyskiisuba oo naafanimadu raadkaas ku reebto.

1.1. Aragtiyaha guud ee Naafada

Naafanimadu waxay u muuqataa mid si khalad ah loo fahmay oo ay tahay mushkilad qofka ku kooban iyo inay la xirirsan tahay caafimaadkiisa iyo mucaawimo in la siiyo, iyadoo dadka naafada ahna loo arkaayo inay yihiin dad buka, aan la mid aheyn dadka intiisa kale ee aan naafada aheyn, una baahan yihiin xannaaneyn keliya. Sidaas daraadeed waxqabadkii bulshada waxa loo jiheeyey in "la gargaaro" ama laga dhigo caadi iyadoo loo maraayo wax xagga daaweynta ama waxqabad la xidhiidha.

Taasi waxay muhiimada saaraysaa baahiyaha daweynta ee qofka naafada ah iyadoo la dayacaayo baahiyahooda guud ee nololeed iyo bulsho. Taaso natiijadeedi ay noqotay in lagu takooro xarumo gaar ah oo keligood iyo qoysaskooda lagu oodo dadka naafada ah. Mar haddii xoogga la saaray xagga daaweynta ama baahiyaha gaarka ah ee dadka naafada ah, waxa meesha ka

baxaya oo dayacmaaya xuquuqdoodii iyo baahiyihii kale. Arrimaha bay'adda ay ku noolyihiin la xidhiidhsan (caqabadaha habdhaqanka dadka, adeegyada ama caqabadaha deegaanka) ee dadka naafada ah gaar uga saaraya bulshada inteeda kale ayaan waxba laga qabanin. Sidaas daraaddeed, habka noocan ah ee waxqabadan wuxuu sii kordhiyey in dadka naafada ah iyo qoysaskooduba faquuqmaan oo gaar u oodmaan.

Tobankii sanno ee u dambeeyey, Ururrada dadka naafada ah ee adduunyadda oo dhan iyo gaashaanbuurtooda cilmi-baadhista, ururrada kale ee bulshada, dawladaha iyo haya'daha iskaashiga dhinacyada badan (multilateral) ee adduunyada oo dhan waxay ka shaqeynayeen sidi ay dib ugu meelayn lahaayeen aragtida naafada laga qabo iyadoo naafanimada laga dhigayo arrin bulsho oo xuquuqul insaan ah. Naatiijadu waxay noqotay in fahamkii hore wax iska beddelaan. Waxana cilmi-baadhistu caddaysay in fahamka naafada ee fiicani ama in naafanimada si dhammaystiran loo fahmaa ay ku jirto marka loo eego sidii arrin bulsho ama lagu eego aragti xuquuqul insaani ah. Fahamkani wuxuu ku salaysan yahay aragtida ah in ay bulshadu tahay tan ay tahay inay is beddesho si ay dhammaan qaybeheeda oo dhan oo ay ku jiraan dadka naafada ahi ay qayb uga noqdaan bulshada.

aragtida bulshada (social model) oo ku salaysan aragti ah in bulshadu ay iyadu is beddesho si dadkeeda naafada ah ay ula qabsadaan. Aragtidani waxay wadataa, iyadoo ku salaysan cilmi baadhis, in haddii isbeddel wax ku ool ah lagu sameeyo habdhaqanka dadka, bay'adda iyo deegaanka oo caqabadaha laga baabi'iyo, dadka naafada ah oo dhammi waxa u suurto geli doonta inay si la siman oo mug leh dadka kale uga qay qaataan bulshadooda xagga dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada. Fikirkani meesha kama saarayo mana dayacaayo baahiyaha adeegyada socod iyo itaal soo celinta (rehabilitation) si loo yareeyo raadka ay naafanimadu ku keento wax-qabsigooda.Ugu dambayn, bulshada oo dhan baa ka faa'iidaysa habkan marka kharashka daryeelku yaraado, ee uu yaraado kharashka ku baxaya adeegyada gaarka ah, ama adeegyada dhinac socda kuwa guud. Ujeeddadu waa inay noqotaa in la garawsado xaqa naafadu leedahay inay door ka ciyaaraan bulshada, helaanna ka qayb-qaadasho iyo in laga ilaaliyo xadgudubyada lagu sameeyo xuquuqdooda.

Si taas loo gaarana waa laysla gartaa caqabadaha hor taagan ka-qayb-qaadashadooda oo la yareeyaa caqabadahaas, ama gebi ahaanba meesha laga saraa-loona beddelaa wax u fududaynaya ka qaybqaadasho buuxda oo la siman tan dadka kale.

Haddaba siyaasaddani waxay waafaqsan tahay shuruucda caalamiga ah ee lagu ilaaliyo xuquuqda aadamaha ee kala ah kuwan:

- Baaqa caalmiga ah ee Xuquuqul Insaanka (1948)
- Heshiiska caalamiga ah ee dhaqaalaha, bulshada iyo xuquuqda dhaqanka (1966)
- Heshiiska baabi'inta dhammaan noocyada takooridda ee lagula kaco haweenka (1979)
- Qawaaniinta Qaramada Midoobay ee fursad ula simidda dadka naafada ah dadka kale (1993)
- Baaqii Salamanka iyo Qodobaynta sida wax loo qabanaayo – waxbarashada (1994)
- Heshiiska cusub ee caalamiga ah ee Qaramada Midoobay ee xuquuqda dadka naafada *(December, 2006)*.
- Heshiiska Afrika ee xuquuqda iyo xaqa dadka (1981)
- Qorshe waxqabadeedka Qaaradda Afrika ee arrimaha naafada (2002)
- Heshiiska xuquuqda carruurta (1989)
- Tobanka sano ee Afrika u qoondaysay wax u qabadka dadka naafada ah (1999-2009 – 2010-2019)

Sannadkii 2006, waxa dhacay isbeddel weyn oo faa'iido u leh dadka naafada ee adduunka, waxana soo baxay heshiiskii 6aad ee qaramada midoobay, oo ah heshiiska xuquuqda dadka naafada ah oo la soo bandhigay lana ansixiyey 2008, kaasoo ku xigay heshiiskii xuquuqda carruurta iyo heshiiskii xuquuqda haweenka. Ilaa hadda 110 waddan ayaa aqbalay 153 kalena wayba saxeexeen. Heshiiskani wuxuu noqday lagama maarmaan maaddaama aanay baaqyadii iyo heshiisyadii ka horreeyey ee la ansixiyey si ku filan kor ugu qaadin una ilaalin xuquuqda dadka naafada ah. Waxay markaas rajadu tahay in heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda naafadu fududeeyo isbeddello mug leh oo sharciyad ku qotoma si loo ilaaliyo xuquuqda dadka naafada ah iyadoo loo maraayo in wax ka baddel lagu sameeyo deegaankeenna si markaas baahiyaha kala duwan iyo xuquuqaha dadka kala duwani meel ugu yeeshaan. Waxa markaas yoolka la saarayaa isbeddello muhiim ah oo xaaladda aan habboonayn ee caqabaadka deegaanka, adeegyada, iyo habdhaqanka iyo takoorka dhaqaalaha leh dhex dhigtay dadka naafada ah iyo bulshada inteeda kale.

Waxa kale oo tallaabo muhiim ahi dhacday 2011, oo la soo saaray warbixintii caalamka ee dadka naafada ah ka hadlaysay oo ay soo wada saareen ururka caafimaadka adduunka iyo Baanka adduunku, oo daraasad iyo dib u eegis iyo tirobkoob sameeyey arrimaha naafada. Warbixintan waxa ku jira sagaal talo-bixinood oo muhiim ah. Waxa ugu weynaa talobixinahaas in la xoojiyo in waxqabadka naafadu ku salaysnaado daraasad iyo cilmi baadhis, in arrimaha wax u qabadka naafadu qayb ka ahaadaan horumarinta bulshada ee aan gaar loo saarin, iyo in la xaqiijiyo in siyaasadi hagto iskaashi dhinac walba leh oo wax loogu qabanaayo.

Iyadoo la eegaayo dhibaatooyinka haysta qiyaasta naafada ee 20% ah ee bulshada Somalia, Mid ka mid ah waxyaabaha ducfiga ah ee ku jira wakhti xaadirka dhinaca adeegga waxaa ka mid ah iyadoo aanay jirin siyaasad qaran oo cad oo u dejisan. Siyaasaddaasi waxay si cad u qeexaysaa oo hagaysaa higsiga sidii loo meelmarin lahaa xuquuqda dadka naafada ah iyadoo loo maraayo in meesha laga saaro wixii caqabaad ah dhinaca adeegga dadka naafada, deegaanka iyo habdhaqankaba si ay si buuxda uga qaybqaataan bulshada iyo dhaqaalahaba, iyo inay si siman u helaan addeegyada jira, iyadoo wixii adeegyo ah ee maqan ee naafadu u baahan tahayna la abuuraayo. Siyaasaddani waxay dariiq u jeexaysaa waxqabadka cid kasta oo door ku leh sidii bulshada Somalia u noqon lahayd mid is wadata oo bilaa takoor ah, oo dadka oo dhan awood loo siiyey in kartidooda la adeegsado si Somalia bulshadeedu u gaadho meel fog. Sidaas daraadeed siyaasaddani waa min-qiyaaska dedaalka dawliga ah ee sidii baahiyaha naafada loogu dari laha wax qabadka bulshada ee socda.

Tallaabada looga baahan yahay baarlamanka Somalia waa in ay ansixiyaan siyaasaddan si ay u hesho aasaas sharci, taasoo noqon lahayd tallaabo muhiim ah oo loo qaado xagga wax ka qabashada dhibaatooyinka haysta dadka naafada ah.

- **1.2. Ujeeddooyinka iyo Hadafka Siyaasadda**

Hadafka guud ee Siyaasada Naafadu qaranka waa in bulshada Somalya noqoto mid aan faquuqin naafada, oo bilaa caqabad u ah naafada, kuna dhisan xuquuqul insaanka si ay dadka naafada ahi ugu dhex noolaan karaan. (Sinaan karaan)

Siyaasadan ujeedadeedu waa in kor loo qaado xaaladda nololeed ee dadka naafada ah si loo helo taas, waa in talabooyinkan hoos ku qoran la raacaa: -

• Dhiirri-gelinta horumarka dadka naafada ah.

• Awood siinta ururrada dadka naafada ah iyo ururo kaleba si meesha looga saaro caqabadaha bulsho ee jira.

• In dib loo eego waxna laga beddelo qawaaniinta aan bulshada isku wadaynin ama aan waafaqsanayn mabaadiida heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda dadka naafada ah

• Adeegga oo kor loogu qaado oo arrimaha naafada lagu dhex daro adeegyada guud ee bulshada.

• In loo ogaalado dadka naafada ah ka qayb galka go'aan qaadashada iyo fulinta hawlaha muhiimka ah ee ka dhex socda bulshada dhexdeeda.

Dhokumentigan siyaasadda Naafada ee Qaranku wuxuu hordhac u yahay siyaasado kala duwan mustaqbalka laga soo saaro arrimaha naafada sidii loogu dari lahaa adeegyada bulshada oo ay Wasaaraddaha kala duwan mustaqbalka samaysta ku kuleh. ***Wasaaradd Shaqada iyo Arrimaha Bulshadu*** (MOLSA) waxay hormood u tahay tiro kale oo Wasaaraddo kala duwan ah sida, **Wasaaraadda Qorsheynta Qaranka, Wasaaradda Maaliyadda,** ***Wasaaradda Caafimaadka, Wasaaradda Waxbarashada iyo Wasaaradda Hawlaha Guud iyo*** **Guryeynta** si ay u samaystaan siyaasad hoosaadyo ku wajahan dadka naafada ah sidii baahiyahooda si buuxda loogu dari lahaa hawlaha ay ummadda u hayaan wasaaradahaasi ee ay masuulka ka yihiin

1.3.Raad-Raac (Background)

Dawladda Somalia waxaay xaqiiqsatay in arrimaha naafadu ay yihiin kuwo qayb walba oo bulshada ah soo gelaya isla markaana u baahan inay ka qayb-qaataan qaybahaas oo dhan. Si caqabadaha jira meesha looga saaro waxa loo baahan yahay gacan ka geysashada qaybaha bulshada oo dhan. Caqabaduhu waxay saameeyeen qayb walba oo nolosha naafada ka mid ah sida dhaqaalaha, arrimaha bulshada, dhaqanka, siyaasadda iyo deegaanka.

Si haddaba loo fuliyo oo loo meelmariyo siyaasaddan, waxa lagama maarmaan ah in cid kasta oo door ku leh lagu soo daro, in la sameeya qorshe hawl-fulineed faahfaahsan oo u kala horreeya sida ay arrimuhu u kala muhiimsan yihiin si markaas wax looga qabto qodobada mudan, sida mashaariicda, dib u

eegista mashaariicda, si loo fuliyo talo-bixinaha siyaasaddan iyo hadafkeeda guudba.

Waxaa la filayaa in siyaasaddan bilowga ahi ay hagto samaynta qorshe hawl-fulineed faahfaahsan; si loo gaadho ujeeddooyinka siyaasadda naafada qaranka. Mustaqbalka dhowna waxa laga yaabaa in loo baahdo xeer qaran oo la ansixiyo oo siyaasaddan ku salaysan. Siyaasaddan bilowga ahi waxay keliya oo bixinaysaa tilmaan guud si wax looga qabto inay naafadu helaan xuquuqdooda oo lagu xuso xeer kasta, dhinacyada kala duwan, gaar ahaan kooxaha ugu nugul oo ay ka mid yihiin carruurta naafada ah, dumarka naafada ah iyo naafada qaxootiga ah iyo naafada waddanka gudihiisa ku qaxsan.

1.4. Adeegyada jira ee Naafada

Qaabdhismeedka dawliga ah ee adeegyada:

Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay leedahay waaxda dhaqan celinta iyo deryeelka Naafada oo gaaran ugu xilsaaran arimaha naafada Marka ay timaado siyaasaddan naafada ,

marka la ansixiyo siyaasaddan wasaaradda doorkeedu waa:

.Inay taageerto Naafada Qaranka Soomaaliyeed.

- inay xaqiijiso habsami u faafinta siyaaasaddani waxa ay xambaarsan tahay
- inay qabanqaabiso in sannadkiiba mar ay isu yimaaddaan cid kasta oo door ku leh, si loo qiimeeyo wixii ka qabsoomay qorshe-hawl-fulineedkii la sameeyey
- in laba-sano iyo badh kaddib siyaasadda dib loo eego oo la hufo
- inay warbixin ka siiso cid-kasta oo door leh wixii qabsoomay iyo caqabadaha ka hor yimid ee u baahan in wax laga qabto
- inay wasaaraddu talo-bixin ka soo jeediso meelaha isbaddel in lagu sameeyo u baahan siyaasadda (Review Stage)
- in wixii kheyraad ah ee hawshu ku fulayso ay wasaaraddu qoondayso

Waxa intaas dheer, qorshaha ah in wasaarad kasta laga sameeyo qof lagala xidhiidho arrimaha naafada (focal point).

Koomishanka Xuquuqul insaankuna wuxuu leeyahay borogram ama mashaariic dhinaca difaacidda dhinaca sharciga iyo wacyi gelinta xuquuqda dadka naafada ah.

- **Golaha Metela Naafada:**

Golaha Guud iyo Hadda jira oo u adeega dadka naafada ah waxaa lagu aasaasay Somaaliya dhexdeeda muddo kala duwan iyo goobo kala duwanba oo heer gobol ilaa heer qarana leh,waxayna si aad ah isugu hawlaa wax u qabadka dadka naafada ah iyo udoodista xuquuqdoodaba. Guud aahaan golahani waxaa aas aasay wasaaradda shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo xiriir wanaagsan ka dhexeeyo.

Dhinaca Waxbarashada:

Habka waxbarashada loo dhanyahay weli ma jiro (inclusive education) mana jiro qaababkeedii waxbarasho, adeegyada waxbarasho ee naafadana waxa badi bixiyo iskuuladda loo yaqaanno "baahiyaha gaarka ah" oo gaar wax u bara carruurta naafada ah oo keliya, iyagoo u eegaaya nooca naafonimadooda. Dhowaanna waxa la sameeyey siyaasada ku qotonta waxbarashada loo dhanyahay iyadoo qorshaha waxbarashada aan cidina ka maqnayn la rabo in la hirgeliyo si carruurta naafada ah oo dhammi uga qayb-qaadato waxbarashad si la siman carruurta kale, oo waddanka oo dhanna laga fuliyo taas.

Waxaa jira iskuullo carruurta baahiyaha gaarka ah leh oo ka furan goobo kala duwan. Iskuulladaasi waxay siiyaan adeeg waxbarasho carruurta leh naafanimada xagga garaadka iyo naafanimada isku-dhafan ama dhowr naafo ah. Waxa iskuullkaasi hadda gacanta ku haya haya'adda waxbarashada Gaarka ah ee DAD IS XIL QAAMAY oo ay gacan siiso NGOs iyo ganacsato soomaaliyeed.

Iskuullada dhegoolayaasha ee gobollada iyo iskuullada dhegoolaha iyo indhoolayaasha ee hadda jira waxay waxbarasho siiyaan carruurta dhegaha la' ama kuwa maqalkoodu dhiman yahay. Xarunta lagu barto farta indhoolaha ayaa isaguna Muqdisho ka furan oo waxbara carruurta indhoolayaasha. Iskuullda Mogadisho ee dhegoolayaashu wuxuu sidoo kale leeyahay qayb boodhan ah.

Hayadaha caalamiga ah:

Haya'do caalamiya ayaa jira oo qabta hawlo taageeraya ka hortagga naafanimada. Hawlahan badankoodu waa ololayaasha tallaalka ee ay fuliso Wasaaradda Caafimaadka oo ay Ka taageeran Hay'adda UNICEF iyo WHO. Sidoo kale Ururada Caalamiga ah ee iyaguna taageera Ururrada dadka Naafada ah iyo kuwa naafada u adeega, iyo halwo ay ka mid yihiin xuquuqda naafada, iyo in naafada lagu daro hawlaha socda oo dhan waxaa ka mid ah ***Africa educstional trust.iyo Wasaarada Shaqada Arrimha Bulshada***

Haya'do caalamiya oo dhowr iyo kuwa iskaashiga ayaa naafada wax ka qabta iyagoo ku daraya dhammaan hawlaha kala duwan. Muddadii la soo dhaafayna D.B.G. (DARYEEL BULSHO GUUD) DRC iyo UNICEF ayaa marmar arrimaha naafada waxqabad ka geysta.

Cutubka 2 : Deraasadda Xaaladda (Situation Analysis)

Dawladda Somalia waxay mujisay sida ay uga go'an tahay in kor loo qaado nolosha dadka naafada fikriyan, hase yeeshee, wadanku maalaha dhokumenti qaabshaqeed cad ah oo lagu difaaco xuquuqda dadka naafada.

Cutubkani wuxuu diiradda saarayaa arrimaha furaha ah ee qeexaya xaaladda dadka naafada ahi ku sugan yihiin.

Dhibaatooyinka qaybaha naafadu way badan yihiin wayna kala duwan yihiin. Naafada laftigeedu caqabad maaha laakiin dhibtu waa deegaanka, haya'daha, Hab-dhaqanka dadka iyo dhaqaalaha weeyaan waxaa ka hortaagan dadka naafada inay ka qaybqaatan arrimaha danahooda, waana kuwaas kuwa ka faquuqaya bulshada inteeda kale. Caqabadahan badankoodu mar mar natiijadoodu waa go'aano ka yimaada "***aragtidii hore***" oo khuseeya dadka naafada ah oo inay yihiin "***dad wax ka khaldan yihiin***" ka gaar ah bulshada una baahan in "***Dib loo toosiyo***.". Wakhtiyada qaar kalena caqabadahani waxay ka iman karaan, fakir la'aan, kala-jeclaan la'aan iyo faham la'aan. Caqabadahan soo socda waxaa la ogaaday lana aqoonsaday kadib markii la yeeshay shirar iyo kulamo lagu falanqeenayey samaynta siyaasadan taaso noqotay xidid hoosaadka hortaagan dadka naafada ah inay bulshada wax la qabsadaan:

2.1. Caqabadaha iyo Waxyaalaha hawsha fududeeya

Iyadoo Bini'aadmigu uu ikhtiraacay waxyaalo badan oo wax fududeeya xagga shakhsiga iyo bulsho ahaanba (sida farta indhooluhu wax ku qoro, Fara-kula hadalka dhegoolaha, Bulshadu waxay taariikh ahaan u dhigtay caqabado dadka naafada ah kuwaas oo ah kuwa Meelaha dadka naafada ahi ka galaan dhismayaasha ee siman, Fisiyoteribiga, lugaha samayska ee dadka lugaha ama gacmaha go'ani isticmaalaan, siyaasadaha waxqabada ee aan cidna laga tegaynin, gaadiidka la-wada isticmaali karo, iyo barnaamijka kombuyuutarrada ee lagu hadlo, oo dhammaantood dadka naafada ah u suurtogeliya inay ku noolaadaan nolol sharaf huwan, iyo inay si buuxda oo la siman dadka kale uga qayb qaataan nolosha bulsho, dhaqan iyo dhaqaale ee bulsha weynta ay ku dhex nool yihiin. Hase yeeshee Somalia dadka naafahada ah badankoodu caqabaad ayay maalin kasta la kulmaan. Caqabaadkaasi waxay xannibaad ku yihiin inay bulshada wax ku kordhiyaan si la mid ah muwaadiniinta kale.

Waddankeena, sida bulshooyin kaleba innala qabaan, waxan taariikh ahaan dadka naafada ah ku soo rognay caqabado xagga degaanka iyo bay'adda ah, kuwa xagga adeeg helidda la xidhiidha, kuwa habka loola dhaqmo ah, kuwo xagga dhaqaalaha caqabadahaas oo dadka naafada ah geyeysiiyey nolol leh isku-tiirsanaan la'aan, heerar kala duwan ah, aan loo baahnayn oo qofka naafada ahi ku tiirsan yahay qoyskiisa, iyo dadka kaleba si uu u helo daryeel, iyo kaalmo, waxan kale oo ku haynaa naafada faquuqid, takoorid, iyo goonni u saaris. Caqabadaha ugu waaweyn ee dadka naafada ah ee Somalia ay la kulmaanna waxa ka mid ah kuwan soo socda:

a) **<u>Caqabadaha deegaanka</u>**:

Inta badan dhismayaasha danta guud iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada sida caafimaadka, waxbarashada ama warfaafinta maaha qaar ay naafadu geli karto ama isticmaali karto. Taas macneheedu waxa weeye in tusaalle ahaan carruurta naafada ah, haddii ay u baahdaan suuli ay geli karaan aanay iskuulka dhigan Karin koll haddii aanu jirin suuli ay isticmaali karaan. Intaas waxa sii dheer, gaadiidka oo ah mid aanay isticmaali Karin naafadu, wuxu xannibaa ilihii ay dakhli ka heli lahaayeen ama ay bulshada inteeda kale wax kula qaybsan lahaayeen. Dukaamadda aanay geli karini waxay xannibaan inay qoysaskooda daryeelaan. Waxa taas ka sii muhiimsan, warbaahinta dadweynaha ee xagga maamul-wanaagga, caafimaadka iyo arrimo kaleba, iyadoo warbaahintu muwaadiniinta u tahay il-wareed iyo wacyigelineed muhiim ah, maaha mid ay dadka naafada ahi isticmaali karaan mar haddii aan lagu darin fara-kula-hadalka dhegoolaha, cajaladaha duuban, farta indhoolahu akhriyo, sawirro iwm.

Sidaas daraadeed, dadka naafada ahi waa qaar dibedda laga dhigay bulshada oo dhaqdhaqaaqa iyo inay is abaabulaanba laga xannibay. Raadka ay taasi keentayna maaha mid ku kooban oo xoog looga dareemayo xagga xorriyada dhaqdhaqaaqa iyo adeeg helidda keliya. Dadka naafada ahi waxay ku jiraan kuwa ugu nafaqada liita, ugu caafimaad liita, ugu waxbarasho hooseeya, uguna hooseeya xagga shaqo-helista. Marka la soo koobona, qoysaska, dadka naafada ah laftooda iyo bulshada Somaliaba guud ahaan waxa ka lumay oo ka khasaaray kheyraad. Caqabaadka kale ee la ogaadayna waxay kala yihiin:

Badi dhismayaasha danta guud sida wasaaradaha, saldhigyada booliiska, dhismayaasha adeegyada caafimaadka maaha qaar ay naafadu si fudud u geli karto. Waxa ka maqan meelaha bilaa jaranjarada ah ee laga galo (ramps) calaamadaha wax haga, iyo calaamado kale oo fududayn lahaa isticmaalkooda.

Qorshayaasha dhismaha magaalooyinka sida suuqyada laga adeegto iyo wixiila mid ah kuma xisaabtamaan isticmaalka naafada iyo dadkoo dhan

Adeegyada Waxbarashada, Arrimaha Bulshada, Caafimaadka, gaadiidka iyo nidaamka qorshaha xaafadaha ee ay sameeyaan dawladaha hoose ama dawladda dhexe ama ururada mutadawaciinta ahi maaha qaar habboon oo isku xiriirsan oo dadka naafada ah baahiyohooda ka tarjumaya. Taasi waxay keentay in dadka naafada ahi ay awood waayaan oo ay dadka kale ku tiirsanaadaan.

- **b) Caqabadaha Hay'aduhu keenaan (institutional barriers):**

Caqabadahaan waa kuwa toos ah iyo kuwo dadban oo ka dhan ah dadka naafada ah ka hortaagan in ay si buuxda uga qayb-qaatan nolosha qaybeheeda kala duwan. **[**Sida adeegyada] waxaa ka mid ah siyaasadaha, ficillada, iyo hababka khaldan ee ay isticmaalaan oo naafada ka dhigaaya qaar aan muuqanin ama u takooraayan si toos ah ama si dadban; waxana adeegsada xafiisyo sida kuwa shaqada bixiya, ganacsatada, iyo haya'daha dawliga ah.

- Waxay dadka naafada ah ka hor istaagayaan inay si dadka kale la mid ah u isticmaalaan xafiisyada, adeegyada iyo hay'adaha hawlaha haya oo ay ka mid yihiin waxbarashada, shaqo bixinta, caafimaadka, haya'adaha sharciga, gaadiidka, maaliyadda, adeegyada madadaalada, saxaafadda, ka qaybgalka bulshada. Caqabadahan hay'aduhu keenaan ee naafada Somalia la kulmaan badi waxa ka mid ah:
- Iyadoo aanay jirin tirakoob qaran iyo cilmi-baadhis ama daraasad naafada ku saabsan oo u kala saaraysa noocyada naafonimada ee jira

waxay taasi sii kordhisaa inay dadka naafada ahi noqdaan dad aan bulshada ka dhexmuuqanin, waxayna raad ku yeelatay qorshaynta iyo hirgelinta barnaamijyada horumarineed oo aan naafadu ka faa'iideysan.

- macluumaad la isku halayn karo oo ku saabsan arrimaha naafadu waxay raad ku yeelatay sida loo qorsheeyo iyo sida loo maamulo barnaamijyada naafada la xiriira. Dadka sameeya siyaasadaha, dadka wax qorsheeya, hoogamiyaasha bulshada iyo dadweynaha guud ahaan faham fiican uma laha kumana wacyi gashana arrimaha naafada.
- Taasi waxay sababtaa inaan arrimaha naafada waxba lagaga darin barnaamijyada horumarineed ee dawladda, siyaaasadaha waxqabadka guud, iyo barnaamijyada kale. Waxa taas la mid hay'adaha waxbarashada oo min heer aasaasi ah ilaa tacliinta sare sida jaamacadaha aan lahayn siyaasad iyo ku-talagal arrimaha naafada ah.
- Warbaahinta Bulshada weli habaysna qaab ay dadka naafanimada kala duwan lihi u heli karaan; tusaale ahaan, Xogta cudurka Hiv/Aidsku wali maaha ku qoran farta indhooluhu akhriyo ama lagu sheego fara-ku-hadalka dhegoolayaashu isticmaalaan.
- Jaamacadaha cusub iyo macaahiidda tacliinta sare ee hadda la sameeyey kuma darsadaan naafada dadka ay wax barayaan. Sidaas daraadeed sii jiritaanka iyo tayada adeegyada jira oo ay ku jiraan siyaasado waxqabad oo aan cidna ka tegin, tallaabooyinka caqabad la'aanta sahlaya, fisiyoteribiga, adeegyada qalabka socod-caawinta, adeegyada bulshada, adeegyada dawaynta cudurrada dhimirka, hawlgallada talo-siinta (psychosocial) waxay dhammaantood xoog ugu tiirsan yihiin haya'daha aan dawliga ahayn iyo caawimada dibedda. Ma jiraan adeegyo ku filan la-talinta (psychosocial) ama adeegyada bulshada ee naafadana lagu daray, ama adeegyada caawiya soo celinta itaalka iyo dhaqdhaqaaqa (rehabilitation) oo ay helaan dhammaan 6-da nooc ee naafonimada, oo ka jira bulshada dhexdeeda (community level)
- Inta badan tallaabooyinka waxqabad ee ku wajahan horumarinta adeegyada iyo sidoo kale adeegyada laftoodu sida qorysheynta magaalooyinka, waxbarashada ama gaadiidka dadweynaha adeegyadooda iyo siyaasadooda midna ma laha qodobbo naafada ku saabsan. Taasina waxay keentaa in naafada badankeedu aanay isticmaali Karin. Guud ahaan, muuqaalkaasi wuxuu sababaa in badi barnaamijyada iyo adeegyada lagu yareeyo faqriga, kuwa dakhli-abuurka, caafimaadka,

waxbarashada aanay u qaabaysnayn una diyaarsanayn inay soo dhoweeyaan una adeegaan dadka naafada si la siman dadka kale.

- Naafada laguma daro inta badan barnaamiyada horumarinta dawladda sida qorshahayaasha, siyaasadaha, barnaamijyada min heer degmo ilaa heer qaran. Sido kale, adeegyada waxbarshada sare lagu dhigo sida Jamacadaha, Macadada Cilmi-Baadhista malaha siyaasado u gooni ah dadka naafada oo gudahooda ka jira.
- Qaabdhismeedka jira ee wada shaqeynta, xidhiidhinta iyo isku xidhnashaha ka dhaxeeya ururada wada shaqeynta la leh dadka naafada ee adeegga siiyaa aad buu daciif u yahay ama maba jiro.

- **<u>c) Caqabadaha Hab-Dhaqanka:</u>**

dadka naafada waxaa loola dhaqmaa habab khaldan oo heerar kala duwan iyo noocyo kala duwan leh:, Dadka naafada ah habka bulshadu ula dhaqantaa waxay ka timaaddaa khaladka laga aamminsan yahay ayado loo arkaayo dad aan wax qabsan Karin. Dad caro badan, bilaa faa'iido ah, murugana ku ah bulshada,oo laga naxo, dagaal badan, buka ,caawimo ku nool ,

bulshada culays iyo kharash ku haya, oo qoysaska khayraadka ka marinaya, liita, caqli carruur ah, aan la shaqaalayn karin. Naatijo ahaan dadka naafada ahi waxay soo gudbiyeen waxyaalahan:

- Badanka dhibaatooyinka ay la kulmaan dadka naafada ahi, ama qoysaskooda iyo bulshada waxay ka soo jeedaan faham iyo fikrado khaldan oo laga aaminsan yahay naafanimada sida aragtida ah in naafanimadu ay ka timid inkaar xag Alleh kaga dhacday qofka naafada ah. Waxaa jirta faquuqid dadka naafada ku khasbaysa inay dibada uga baxaan nolosha caadiga ah ee bulshada guud.
- Aamminaadda khaldan iyo waxa laga aamminsan yahay qofka naafada ah daraadeed ayaa qoysaska qaarkood ilaalin xad-dhaaf ah ku sameeyaan qofka naafada ah
- Ilaalinta xaddhaafka ah ee dadka naafada qaarkood la siiyo waxay ku hoogaminaysaa oo ku sii kordhisaa ku tiirsanaan ka xannibta inay helaan adeegyada dhaqaale iyo bulsho. Tani kaliya saameyn kuma yeelanayso shaqsi ahaantooda laakiin waxay ku yeelanaysa xitaa qoysaskooda.

- Aamminaad khaldan oo Somalia dadkeedu ay ka qabaan dadka naafada ahi waxa weeyaan inay ula dhaqmaan sidii dadka dad buka oo u qalma in loo naxariisto, la daryeelo oo la daweeyo keliya. Taasi waxay keentaa in dadka naafada ah la faquuqo oo loo arki waayo inay yihiin dad sida dadka kale xuquuq leh oo la siman

Dhammaan qabadahan deegaan, kuwa haya'aduhu keenaan, habdhaqanka khaldan, iyo sidoo kale arrimo kale oo ku gurracan naafada, waaxay ka yimaaddaan aqoon la'aan iyo khalad ka aaminsanaan – waana kuwo dhammaan wax laga beddeli karo. Sidaas daraadeed waxa lagama maarmaan iyo khasab ah in la istiraatejiyado wacyi-gelineed oo bulshada ah la sameeyo si meesha looga saaro khaladaadka laga aaminsan yahay naafanimada. Keliya marka caqabaadkaas wax laga qabto ayay dadka naafada ahi noqon doonaan dad loo tixgeliyo sida dadka kale oo loo awood siiyo inay iyagoo isku filan xorriyad iyo sharaf ugu dhex-noolaadaan bulshada Somalia doorkoodiina ka ciyaaraan si ay wax ugu kordhiyaan bulshada iyo waddanka horumarkiisa.

ka nugushahay

2.2.Muhiimad siinta kooxaha naafada qaarkood oo xaaladdoodu kuwa kale ka liitaan

Dadka naafada ahi maaha hal koox oo isku wada mid ah. Dhibaatooyinka ay naafanimada kala kulmaan way kala duwan yihiin iyadoo ku xiran arrimo shaqsiyadeed iyo arrimo deegaanba. Sida bulshada inteeda kaleba ay tahay, waxa jira kooxo naafo ah oo ka duwan oo halka ay bulshada kaga jiraan ay ka dhigayso qaar u nugul in xuquuqdooda lagu tunto sidaas daraadeedna u baahan in si gaar ah loo ilaaliyo. Haddaba cutubkani wuxuu tusaalaynayaa kooxaha ay tahay in xoogga la saaro marka la qorshaynaayo mashruuc noocuu doonoba ha ahaadee, si loo yareeyo nuglaantooda isla markaasna loo difaaco.

Adeegyada marka la bixinaayo, siyaasaddani waxay soo saartay kooxahan soo socda oo muhiimadda la siin doono:

2.3.1. Haweenka Naafada ah

Naafanimada iyo lammaanaha (gender) way isku xiriirsan yihiin, taasina waxay keentaa in xaaladda dumarka naafada ahi ay la kulmaan in loo geysto

xadgudub dilmo ama ay la kulmaan dhibaato si ay waxbarasho u helaan marka loo eega wiilasha ama ragga naafada ah.

2.3.2. Carruurta Naafada ah:

Carruurta naafada ahi waxa la ogaaday inay tacaddiyo badan la kulmaan, kuwaas oo ka badan kuwa tacadiyada lagula kaco carruurta dhiggooda ah ee aan naafada ahayn. Cilmi baaristii ugu dambeeyey ee Afrikada Bari laga sameeyey ayaa taas xaqiijiyey. Haddaba waxa loo baahan yahay in Somalia laga sameeyo daraasad ku wajahan oo lagu eegaayo xaaladda carruurta naafada ah iyo baahiyohooda aasaasiga ah iyo xuquuqdoodaba.

Hay'adaha ku lug leh ee carruurta qaabilsani waa inay horsed ka noqdaan sidii carruurta naafada ah loogu dari lahaa daraasadda xaaladda gaar ahaan dhinacyada diiradda lagu hayo sida: dilista (soo ururin xog tifatiran oo naafada noocyadeeda oo la raaciyo barnaamijyada socda), waxbarashada (inta iskuullada la qoro, inta guulaysata iyo inta iskaga tagta inta ay u dhigmaan), difaacidda (intee baa naafo ah carruurta layska tuuro ama kuwa agoonta ah), helidda adeeg caafimaad (carruurta dhimata immisaa naafo ah iyo nafaqada oo macluumaad dhan laga ururiyo iyadoo naafonimada loo eegaayo)

2.3.3. Dadka da'da ah ee naafada ah

Dadka da'da ah ee naafada ahi waxay u dhow yihiin inay la kulmaan dhibaatooyin ay keeni karto meeqaamkooda bulshada dhexdeeda, iyo xaaladdooda dhaqaale. Iyadoo aan xog sugan laga haynin darteed kooxdan, waxa loo baahan yahay in wax laga ogaado dadka da'da ah xaaladoodu sida ay tahay Somalia, sida dhibaatooyinka ay la kulmaan iyo haddii loo baahdo sida wax looga qaban karo. Daraasadda soo socota ee dadweynaha kooxihiisa ku wajahani waa inay xiriir u samaysaa da'da iyo naafanimada oo diiradda saarta iyadoo la hubinaayo in wax xiriir ahi ka dhexeeyo naafanimada iyo da'da iyo wixii raad ah.

2.3.4. Dadka leh naafonimo dhexe ilaa naafanimo culus, iyo kuwa dhowr naafanimo ku kulmeen

Dadka leh dhowr naafonimo, iyo kuwa leh naafo heer dhexe ah ilaa mid culus, oo lagu qiyaasay 2-3% inay ka yihiin bulshada Somalia waxay badi la kulmi karaan dhibaatooyin sidii ay adeegyada u heli lahaayeen marka loo eego dadka

leh naafanimo fudud ama hal naafanimo keliya kuwa leh. Qoysaskoodana waxa saaran culays weyn maaddaama ay bulshadu aad takoorayso iyaguna ay u baahan yihiin taageero, daryeel iyo caawin. Qoysaskaasi waxay u badan yihiin inay noqdaan kuwa ugu faqiirsan maaddaama dakhligooduna badi iska liito kharash badanina kaga baxayo caafimaadka qofka naafada ah. Sidaas daraadeed waxa loo baahan yahay in daraasad lagu lafa-guro sidii qodobo iyo sida fiican ee wax loogu qaban karo qoysadkaas si aanay faqri qoto dheer ugu dhicin iyo sida loo caawin karo iyadoo sidii ay faqriga uga bixi lahaayeen laga caawin karo muddada dhexe ama dheer. Waa in istiraatejiyadaha faqriga lagu yareeyo ama kuwa mustabalka ee bulshada lagu ilaaliyo ama dib u eegista siyaasadaha ay tahay inay kooxdan ay tahay inay diiradda saaraan kooxdan ay adag tahay sida lagu gaari karo ee bulshada ka mid ah.

Cutubka 3:QAYBAHA SIYAASADAN

3.0. Mudnaan kala siinta siyaasada:

Siyaasadani waxay ku jiheysan tahay dadka naafada shaqsi shaqsi iyo iyagoo iskuduuban oo ah qayb bulshada ka mid ah waxayn ka-hadlaysaa qaybaha kala duwan ee nolosha. Iyadoo sidaas ah, haddana meelaha qaar ayaa la caadeyey in ay u baahan yihiin taxadir gaar ah oo ku salaysan baahida iyo sida ay ugu kala muhiimsan yihiin dadka naafada ee Somalia muddada 5-ta sano ee soo socda. Meelahan mudnaanta la siinayo waxaa muhiim loo arkay muddadii lagu soo jiray shirarki wada tashiga, in wax laga qabto sida kor lagu xusay (iyadoo wax waliba aanay ku dhammayn) laakiin in la dhiso awoodda waxqabad iyadoo isla markaasna baahiyaha kooxaha nugul lagu daraayo waxqabadka guud ee qaybaha siyaasaddan, eeg cutubka 2.2. iyo 2.3. waxaana ka mid ah meelaha waxqabadku ku jihaysan yahay kuwan:

1. Ka hortagid Naafanimada ka dhalata cudurada.
2. Hore u garashada naafonimo inay jirto iyo wax ka qabashadeeda
3. Wacyigelin la abuuro
4. Awood-soo-celin (Rehabilitation)
5. Waxbarashada iyo tababarrada
6. Caafimaadka

7. Caqabad la’aan (Accessibility)
8. Shaqaleynta
9. Kooxo Gaar u Mudan
10. Naafada iyo HIV/AIDS
11. Maamul wanaagga, ka qayb-qaadashada siyaasadda, Xuquuqal Insaanka iyo sharci ku difaacidda
12. Ururada dadka naafada iyo kuwa u adeega naafada

3.1.Ka hortagidda Naafonimada

Hordhac

Mid ka mid ah dhinacyada Siyaasadan aasaaska u ah waa in naafanimada laga hortago. Badi noocyada naafanimadu waa kuwo laga hortagi karo wixii naafanimada ku keenay. Ka hortagga heerka 1aad, heerka 2aad iyo heerka 3aad dhammaantood waa muhiim. Sidaas daraadeed tallaabooyinka caafimaadka bulshada ee wacyi-gelinta iyo helidda adeegga caafimaadba waa u lagama maarmaan in naafonimo inay dhacdo laga hortago. Taageero joogto ah oo marka loo baahan yahay hore loo siiyo qofka ayaa loo gartay inay tahay mid ka fiican oo lagaga hortegi karo istiraatejiyad goor dambe oo wixii dhaceen wax lagu qabto si loo xaqiijiyo in ka hortagga heerka 2aad uu guulaysto.

Waxaa loo baahan yahay in la isu miisaamo taageerada la siinaayo dadka ugu nugul iyo tan ka hortagga ee la siinaayo kuwa khatarta ugu jira naafonimo laakiin aan baahidooda weli loo arkin mid degdeg loogu baahan yahay. In la taakuleeyo qoysaska daryeelaya wiil ama gabadh naafo ahi waa arrin muhiimad weyn leh oo u baahan in xoogga la saaro.

Sababaha Naafanimada keena

Naafanimada badankeeda waxa lagu xiriiriyaa ku noolaanshaha xaaladdo faqri, oo ay astaan u tahay adeegyada caafimaadka, waxbarashada, nafaqaynta oo aan si habboon loo heli Karin iyo dakhli hoose oo qoysku ku nool yahay.

Badi naafanimada waxa keena waxa ka mid ah:

- Cudur ay sababtay xaalad hoosaysa oo fayo-dhowr, iyo adeeg caafimaad la'aan, oo ay ka mid yihiin nafaqodarro iyo Talaal la'aan aan laga talaalin cudurrada naaafada keena,
- Xaalado fayo-dhawr xumo,
- Dagaal, jir-dil, garaacis qofka, iyo xaaladaha bara-kaca
- Shilalka waddooyinka iyo shalalka kale (shilalka shaqada, miinooyinka iyo walxaha qarxa)
- Hooyada uurka leh oo aan helin xannaano ku filan.
- Xaaladda caafimaad ee qofka iyo qoyskiisa (Xaaladaha caafimaad ee la iska-dhaxlo)
- imkaaniyaadka Caafimaad ee aan habboonayni waxay keentaa in kiisas badan oo la daaweeyn lahaa ay ku dhacdo naafonimo daa'im ah.

Siyaasadaha ka hortaga naafanimadu maaha kuwo jira ama si toos ah ugu xiran siyaasadaha hore u garashada naafanimada iyo wax ka qabashadeeda. Istiraatejiyad kasta oo wax ku ool ah oo naafonimada lagaga hortegaayo waa inay la socdaan olole ku aaddan sababaha keena naafanimada, sida looga hortegi karo iyo daaweynteeda. Haddaba haddii la soo koobo, waa in awoodda la saaraa sidii looga hortagi lahaa naafonimada halka laga saarayo sidi loo daaweyn laha.

Ujeeddo: Ka hortagga naafanimo inay dhacdo iyo xaaladaha naafanimo keena.

Qodobada Siyaasada:

- Ka hortagga waxa lagu dhex darayaa siyaasadaha faqri yaraynta waxana la xaqiijin doonaa in xiriirkaas si guud ay u fahmaan dadka siyaasadda dejiya ee haya'daha dawladda ee kala duwan.
- Wasaaradda Caafimaadka (WC) waa inay samaysaa siyaasad iyo waxqabad lagaga hortegaayo naafonimada oo leh qaybaha soo socda iyadoo lala jaanqaadaayo siyaaasadaha kale ee dawladda. Waxaana ka mid ah kuwan soo socda balse inta halkan ku qoran kuma koobna:

- heerka tayo iyo meelaha uu gaadho ee adeegyada caafiimaad ee hooyada inta aanay dhalin iyo dhalmada kaddib la siiyo iyo inay horumariso wacyi-gelin caafimaadka haweenka iyo uurka ku saabsan.
- Ardayda in baaritaan caafimaad lagu sameeyo marka dugsiyada hoose iyo heerarka kale ee waxbarasho la qoraayo si naafonimo wixii jira goor hore loogu ogaado
- In bulshada laga wacyigeliyo halista u leeyahay guurka ehelka aadka isugu dhowi oo keeni kara nafanimo.
- Tababaro iyo wacyigelin la siiyo kor loogu qaado aqoonta iyo xirfada umulisooyinka iyo umuliso dhaqmeedka labadaba si looga hortago naafanimada.
- Waa in xoogga la saaro wacyigelinta ku saabsan nafaqada, caafimaadka iyo nadaafada ku wajahan hablaha dhallinta yar, hooyooyinka uurka leh iyo haweenka ku jira da'da dhali karta. Barnaamijyada wacyigelinta ee ka hortagga waxaa lagu sameynaya heerka iskuulada iyo heerka tababarka macalimiinta

- Barnaamijyo ayaa la samayn doonaa lagu baarayo carruurta caafimaadkooda si loo ogaado kuwa khatar ugu jira inay naafoobaan.
- Wasaaradda Caafimaadka waa in ay kor u qaada tayada adeegyada dhalmada ee cisbitaalada.
- Shaqaalaha "Safka hore" ee Caafimaadka iyo waxbarashadu waa inay hayaan diiwaan sir ah ee carruurta naafada ah iyo kuwa kale ee khatar ugu jira inay naafoobaan marka ay dhashaan carruurtaasi, waana in la sameeyaa hab shaqaynaaya oo adeegyada kala duwani isugu gudbiyaan carruurtaas .
- Shaqaalaha caafimaadka waa in tababarka loogu daraa wacyigelinta naafada oo ay qayb ka noqota waxbarashada caafimaadka iyo kuwa la shaqeeyaba.
- In la balaadhiyo tallaalka ka dhanka ah cudurrada lag hortegi karo ee keena naafanimada
- In la fuliyo sharciga nabadgelyada waddooyinka iyo wixii la mid ahba sida sharciga nabadgelyada goobaha shaqada si looga hortago shilalka waddooyinka, shilalka miinooyinka iyo walxaha qarxa iyo noocyada kale ee shilal iyo waxyeello;

- In la baro dadka nafaqada wanaagsan iyo maamulka deegaanka.
- In kor loo qaado imkaaniyaadka caafimaad iyo adeegyada dalka ka jira.

3.2. HORE U GARASHADA NAAFONIMADA IYO WAX KAQABADKEEDA

Waxa laga marmaan ah in hore loo ogaado waxna laga qabto naafonimada carruurta iyo dadka waaweyn ama dhallinyarada u nugul inay naafoobaan. Hore u ogaansho ay raacdo wax ka qabasho haboon waxa ay fursad u tahay Ciribtirka iyo daaweynta xannuunka keenayaa naafanimada iyo saameynta nolosha ay ku yeelan karto mustaqbalka. Xaqiiqada dhabta ah ee ay waalidiintu ku qarsanayaan ubadkooda naafada ah, oo ay sabab u tahay fikirka xun ee ay naafonimada ka qabaa, waxay ku keenaysa inay ka horjoosanaysaa sidi ay u heli lahaayeen adeega ku haboon xilligii loo baahnaa.

Sidaa awgeed, waxa loo baahan yahay in la sameeyo oo la xoojiyo jawaab qaybaha oo dhammi ka wada qayb qaataan sida adeegyada caafimaadka, adeegyada bulshada iyo kuwa naafada u shaqeeya oo kuwa dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn ee ay khusayso ku jiraan iyadoo laysu kaashanaayo sidii naafonimada hore loogu ogaan lahaa horena wax loogaga qaban lahaa, waxaana la abuuri doonaa imkaaniyaadkii loo baahnaa si loo gaadho hiigsigaas.

Dalwaddu waa inay horsed ka noqotaa sidii tallaabooyin habboon loo qorshayn lahaa, iyo sidii loo fidin lahaa wacyi-gelin bulshada laga siiyo jiritaanka adeegyadaas, gaar ahaan xogtaas loo gaarsiin lahaa meelaha miyiga ah, isla markaasna loo xaqiijin lahaa in dadweynaha oo dhammi adeegyadaas wada heli karaan.

Dawladdu waxay qaadi doontaa tallaabooyin lagu gaarsiin aayo xogta jiritaanka adeegyadan bulshada gaar ahaan kuwa ku nool meelaha miyiga ah.

Ujeeddo: Waxa la samayn doonaa oo la xoojin doonaa istiraatejiyad wada-socota si naafonimada hore loogu ogaado oo goor hore wax looga qabto.

Qodobada Siyaasada:

- Wasaaraddaha dawladda ee ay ka mid yihiin Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Wasaaradda Caafimaadka iyo maaliyadda waa inay horseed ka noqdaan samaynta iyo fulinta istiraatejiyado hore loogu ogaanayo naafonimada iyagoo kaashanaaya siyaasadda ka hortagga naafonimada ee kor ku xusan. Waana in naafanimada noocyadeeda oo dhan wax laga qabtaa sida tan jirka, tan aragga, tan maqalka, tan hadalka, tan maskaxda iyo garaadka.
- Dhakhaatiirta iyo caawiyaasha dhakhaatirtu khaaska ah waa in ay si tayo leh loo tababaraa loona qalabeeya si ay hore ugu ogaan karaan naafanimada carruurta.
- Waa in la sameeyaa dokumentiyo habboon oo lagu baadho naafanimada si hore loogu ogaado
- Qaybo Tababaro iyo adeegyada naafada ee hore u ogaanshaha naafonimada iyo hore wax uga qabashada ayaa la diyaarin doonaa
- Haya'adaha Tababarka shaqaaluhu waa inay xaqiijinyaan in shaqsiyaadka bixiya adeegyada taakulaynta sida: waxbarashada , daaweynta cilmi-nafsiga, fisiyoterabiga, Okubeshanal terabi, dadka leh

cilmiga dhagolayaasha, baridda hadalka (speech therapy), takhasuska talo bixinta iyo tababaradda (vocational Counselling and training), kalkaliyaasha bulshada laga heli karo tiro ku filan.

- Abuurtista agabkii iyo addeeggii laga marmaanka ahaa ee xojinayaa adeegyada iyo agabka jira ee hore wax loogaga qaban karo naafonimada

3.3. ABUURISTA WACYIGELINTA

Dadka siyaasada sameeya, kuwa qorsheynta, hogaamiyasha bulshada iyo shicibku guud ahaan faham fiican kama haystaan arrimaha naafada. Taasi waxay sababtay in badi dadka naafada ahi ku sii jiraan takoorid, faquuqid iyo inay ku nolaadaan nolol tayadeedu aad u liidato.

Habdhaqanka khaldan ee bulshadu ka qabto naafanimada iyo dadka naafada ahi waxa uu noqday caqabadda ugu weyn ee hortaagan in naafadu dadka dhexgasho oo ka mid noqoto oo ay si siman uga qaybqaataan dhinacyada kala duwan ee nolosha bulshada.

Waxaa muhiim ah in fahamka khaldan la saxo kana fa'iideystaan dadka naafadi fursad walba oo ay ku xaqiijin karaan inay nolol wax soo saar leh oo la siman tan dadka aan naafada ahayn ku noolaadaan.

Dadka naafadi waa kuwa ugu habboon inay u dooddaan arrimohooda iyo arrimaha naafada kaleba. Tayada nolosha dadka naafadi waxay kor u qaadmaysaa marka ay si firfircoon u soo bandhigan danahooda iyo marka ay ka qayb galaan go'aan qaadashada.

Ujeeddo: Ciribtirka fahamka khaldan ee naafanimada laga qabo iyo caqabadaha fahamka khaldani keeno, iyadoo la isticmaalayo wacyigelin iyo waxqabad aan dadka lakala soocaynin:

Qodobada Siyaasada:

- Waa in la xaqiijiyaa in dadka ay door firfircoon ka qaataan sidii loo beddeli lahaa caqabadaha salka ku haya fikirka khaldan looguna beddeli lahaa wax nolosha u fududeeya naafada, iyo sidii wacyi-gelin looga samayn lahaa naafanimada
- Waa in daraasad lagu sameeyaa oo la ogaadaa noocyada caqabaadka hab-dhaqanka dadka iyo waxyaalaha fiicanba ee dadka naafada ahi la kulmaan, kaddibna looga samayn lahaa barnaamijyo wax-ku-ool ah oo wax lagaga qabto caqabadahaas habadhaqanka iyo fahamka dadka
- Samaynta istiraatejiyad lagu ku wajahan sidii caqabadaha habdhaqanka dadka loogu beddeli lahaa wax fududeeya nolosha dadka naafada ah yadoo loo adeegsanaayo wacyi gelin iyo waxyaalo kaleba laysna kaashanaayo ururrada dadka naafada ah iyo hayadaha kale ee horumarinta bulshada

- Wada shaqeyn dhow oo lala yeesho Ururrada dadka naafada si loo bilaabo korna loogu qaado barnaamijyada loogu talogalay in kor loogu qaado heerkooda wacyigalineed ee xuquuqdooda gaarka ah iyo awooddooda wax-qabsi.
-
- Dhiirigelinta doorka warbaahinta iyo sidii ay uga qayb qaadan lahayd in takoorka laga tago oo bulshada qaybaheeda kala duwani is wataan isla markaasna dadka naafada ah ay u isticmaasho tusaaleyaal fiican oo lagaga daydo waxqabsigooda.
-
- In warcyigelintu qayb ka ahaato waxbarashada carruurta, si fahamka khaldan meesha looga saaro, laguna daro tababarada manaahijta dhammaan shaqaalaha takhasuska ah
- In wax laga qabto ka muuqasho la’aanta naafada iyo fahamka khaldan ee laga qabo qiimaha qofka naafada ah iyadoo la istimaalayo wacyigelin loo sameeyo ku saabsan sidii ay arrimaha naafada ugu dari lahaayeen barnaamiyada horumarineed ee socda oo dhan dadka sameeya siyaasadaha, urrurada aan dawliga aheyn oo ay ku jiraan kuwa qaramada

midoobay, Wasaaraddaha dawladda, Madax dhaqmeedka iyo ka qaybqaatayaasha kale oo dhan.

3.4. AWOOD CELIN (REHABILITATION)

Hordhac

Qeexid:

Awood-celintu ma khuseyso oo keliya kuwa jir ahaan naafo ah laakiin waxay kale oo khusaysaa kuwa aragga ka naafo ah, kuwa maqalka ka naafo ah iyo kuwa maskax ahaan naafada ah. Sidaas awgeed waa in qayb kasta oo naafonimo ah loogu daraa wixii adeegyo ay u baahan yihiin.

Tusaalle ahaan adeegyada dadka jir ahaan naafada ahi u baahan yihiin waxa ka mid ah xarumaha xaruumaha dhaqancelinta, adeegyada fisiyoterabiga, hoosooyinka lagu sameeyo qalabka naafada ka caawiya socodka iyo dhaqaaqa. Adeegyadano waa in ay ku dhowaadaan cisbitaalada heer gobol ama heer degmo oo leh adeegga qalliinka, si ay dadweynaha deegaanku si fudud ugu gaari karaan. Adeegyaada mustaqbalka waa in lagu daraa lagaha atificialka ah ee dadka lugaha go'ani ku socdaan iyo biraha dadka baaralayska ahi ku socdaan (prosthetics and orthotics) oo badi aan si fiican looga haqab tirin kuwa u baahan.

Iyadoo adeegyada awood-celinta ee naafanimada jirka (physical rehabilitation) ay ka jiraan Somalia iyo waxoogaa adeegyada caafimaadka dhimirka oo bulshada dhexdeeda ah, in kastoo labadooduba u baahan yihiin in la sii fidiyo lana sii xoojiyo, waddanka waxa ka maqan adeegyada awood celinta ee ay u baahan yihiin dadka leh naafanimada garaadka, tan maqalka, tan hadalka iyo tan aragga oo iyaga iyo qoysaskoodaba anfici lahayd. Waxaa kale oo sidoo kale maqan adeegyada bulsho dib-u-dhexgalka iyo adeegyada xirfad dib u siinta.

Waxa jira sadex nooc oo ah qaabka adeegga dhaqan celinta lagu bixiyo oo ku qoran buugaagta akhriska, waxayna kala yihiin nooca adeegga ay bixiyaan xarumo uu qofku adeegga u soo doonto, nooca adeegga ay shaqaaluhu ugu tagaan qofka goobtiisa, iyo nooca adeegga ee aasaaskiisu yahay bulshada dhexdeeda (community based rehabilitation - Helander, 1999)

Ujeeddo: Waa in la xaqiijiyo in adeegyo awood-celin ku filan ay jiraan oo dadka naafada ah iyo kuwa naafanimada qarka u saaran baahiyohooda kala duwan ee adeegyadan daboola, iyadoo la higsanaayo in heerka ugu sarreya ee la gaarsiin karo dhinaca bulshada, xirfadda iyo awoodda iyo dhaqdhaqaaqa qofka iyo nolol tayo leh la gaarsiiyo.

Qodobada Siyaasada:

- Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo wada shaqeyn la yeelata Wasaaradda Caafiimaadka iyo hay'aadaha kale ee door ku leh, si loo sameeyo Siyaasad dhamaystiran oo awood-celineed oo heer qaran ah iyo hab adeeg bixineed oo ku wajahan baahiyaha dadka naafada ah oo dhan iyaga iyo qoysasskoodaba iyo weliba kuwa inay naafooban khatar ugu jira, oo ay ka mid yihiin balse aan ku koobnayn:
- Xoojinta iyo kobcinta adeegyada ay bixiyaan xarumaha dhaqan-celinta si naafada u baahan loogu soo gudbin karo;
- Dhiirri gelinta iyo sameeynta tababarada shaqaale takhasus ah oo ka shaqeeya adeegyada dhaqan celinta oo ay ku jiraan kuwa ka shaqeeya bulshada dhexdeeda iyo kuwa la midka ahba
- Xaqiijinta in dawladdu ay lacag u qoondayso ay ku darto miisaaniyadda adeeg bixiyeyaasha aan dawliga ahayn, isla markaana ay taageerto in hay'adahaasi adeegyadan bixiyaa ay lacag dalbadaan (fundraising) si loo xaqiijiyo in kheyraad ku filan loo helo adeegyadan.
-
- Dhiirri galinta iyo sameynta adeegyada dhaqan-celinta ee aasaaskoodu yahay bulshada dhexdeeda oo gaari karta dadka guryahooda iyo meelaha miyiga ah
- In la xaqiijiyo inay diyaar noqdaan oo la heli karo wax kasta oo qalab caawimo u ah naafada iyo noocyada kale ee saanad taageero ah oo ay

dadka naafada ahi u helaan sida ugu dhakhso badan (qalabka socodka, maqalka, aragga iwm).

- In la xaqiijiyo in dadka nafaada ah iyo qoysaskooda in ay ka qayb galaan marka la qorsheynaayo adeegyadan awood-celineed, la socodka habsami u socodkooda, iyo sida ay u qaabaysan yihiin adeegyadaniba

  In la kordhiyo wacyigelinta bulshada iyo fahamka bulshada eek u saabsan baahida loo qabo qalabka socodka iyo dhaqdhaqaaqa caawiyo iyo adeegyada fisiyotegabigaba.

3.5. Waxbarashada

Hordhac

Carruurta oo dhan, marka lagu daro carruurta naafada ah, waxay xaq u leeyihiin in ay wax bartaan sida uu dhigaayo sharciga cusub ee waxbarashada Somalia. Sidaas darteed waxbarashadu waa xaq aasaasi ah oo qof waliba uu leeyahay. Waxase jirta in badi carruurta iyo da' yarta naafada ah ee Somalia aanay helin waxbarashada aasaasiga ah, waxbarashada dugsiyada sare, iyo waxbarashada heerka saddexaad ama jaamacadaha.

Ujeeddo: In loogu hawl fududeeyo si isku mid ah in dadka naafada waxbarashada u helaan iyo in la xaqiijiyo in faqiir iyo taajir fursadaha waxbarasho loo sinnaado min heer tuulo ilaa heer gobol.

Qodobada Siyaasada:

- Waa in la qorsheeyaa sidii waxbarashada gaarka u ah naafada iyo tan guud ee loo dhan yahayba ay wax ka bartaan carruurta iyo da' yarta iyo qaangaadhka naafada ahi, oo ay qayb ka noqdaan lama dhaafaan ah qorshaha guud ee qorshaynta waxbarashada Somalia ee xilligan.
- Waa in kor loo qaadaa fulinta siyaasadda waxbarashada carruurta naafadaha ah oo marba marka ka dambaysa la sii dhexgeliyaa waxbarashada dugsiyada loo dhan guud, waxbarashaduna noqotaa mid aan cid faquuqaynin, iyadoo qodobadan soo socda la fulinaayo:

- Dhamaan iskuulada waa in laga dhigaa qaar carruur oo dhammi wax ka baran karto iyadoo aan loo eegin naafonimo.
- Kor u qaadida horumarinta dhallaanka iyo dhiirrigelinta oo ka dhaca bay'ad is-dhexgal leh taasoo aasaas u ah bulsho bilaa takoorid ah oo is dhexgasha.
- Fidinta taageerada waxbarashada khaaska ah ee dhammaan carruurta naafada ah oo la siinayo taxadir dheeraad hablaha yaryar
- Baahiyaha khaaska ee Waxbarashada waa in lagu daro qaababka: xirfadda nololeed (life skills) iyo tababarada isku-tiirsanaanta, qalabka socodka caawiya iyo awoodda caawiya, qalabada khaaska ah iyo manhajyada la wada isticmaali karo; tusaale ahaan, luqada faro-ka-hadalka, qalabka waxbarashada indhoolayaasha iyo qalabka waxbarashada caawiya ee habboon.
- Dib u tababarista joogta ah ee macalimiinta iskuulada ee fidiya baahiyaha waxbarashada khaaska ah ee carruurta.
- Xoojinta dabagalka, ilaalinta iyo tayada heerka iskuullada oo dhan si loo xaqiijiyo in Carruurta u baahan waxbarashada khaaska ahi ay helaan taageero.
- Siyaasada waxbarashada loo dhanyahay (inclusive education) waa in la ansixiyaa, oo golaha wasiirradu ansixiyaan;
- Wasaaradda Waxbarashada waa inay ku darta baahiyaha waxbarasho ee loo dhanyahay Misaaniyada Qaranka;
- Wasaaradda Waxbarashadu waa inay soo saartaa istiraatejiyad waxbarasho oo loo dhan yahay (Educaiton For All) oo la magcaabo saraakiil u igman inay dhiirrigeliyaan in carruurta naafada ah lagu daro iskuulada caadiga ah iyo inay warbixin ka siiyaan arrimaha Naafada Wasaaradda Arrimaha Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
- In la xaqiijiyo inay iskaashi dhow yeeshaan oo ka dhexaysa Wasaaraddaha Waxbarashada ,Wasaaradda Caafimaadka iyo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada si ay adeeg wanaagsan u siiyaan dadka naafaada ah iyadoo naafada lafteedu ay qayb ka tahay hab-socodka wax qabadkaas.

- Wasaaradda Waxbarashadu waa in ay kor u qaada wada shaqeynta qaybaha kala duwan ee ka qaybqataayaasha arrimaha naafada, tuusale ahaan Macalimiinta ,daaweeyayaasha, khubarada cilimi nafsiga, walidiinta iyo dadka u dooda nafaada oo dhamaan ka ciyaara door muhiim ah xagga waxbarashada gaarka ah.

- Waax "Baahiyaha gaarka ah ee waxbarasho" waa in la sameeyaa oo ay si firfircoon uga shaqeysaa Wasaaradda Waxbarashada dhexdeeda iyadoo wada shaqeyna la yeelan doonta Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
- Wasaaradda Waxbarashadu waa inay ka shaqaleysiisa iskuulada iyo waaxda waxbarashada gaarka ah macalimiin naafo ah si ay u noqdaan kuwo la hiigsan karo.
- Wasaaradda Waxbarashadu waa inay abuurtaa tababarro gudaha wadanka ah oo joogto ah iyadoo la kaashanaysa haya'adaha aan dawliga ahayn, jaamacadaha, iyo Macaahidda Tababarka Macallimiinta – oo manaahijtana lagu daraa qaybo tacliinta ciyaaraha naafada ah;
-

3.6.CAAFIMAADKA

Faqriga iyo nadaafad darradu waxay sababaan xaalado kala duwan oo naafanimo. Inta badan naafanimadaas waa laga hortegi karaa haddii nadaafadda la hagaajiyo. Barnaamijyada Wacyi gelinta caafimaadka ee dawliga ah waa inay xoogga saaraan ka hortagga iyo in dadka la baro maamulka deegaanka iyo nafaqada. Soomaliya waxay samaysay dedaal weyn oo dadka lagu gaarsiin aayo caafimaadka aasaasiga ah oo aan qaali ku ahayn dadka oo ay heli karaan xitaa dadka faqiirka ahi. Iyadoo sidaas ah, haddana dadka naafada ahi si la mid ah dadka kale uma helaan adeegyadaas. Taasina waxay sababtaa in caafimaadka dadka naafada ahi uu celcelis ahaan ka hooseeyo dadka kale waddamo farada-badan, oo Somaliya-na loo malaynaayo inay waddamadaas la mid tahay, marka loo eego xiriirka ka dhexeeya naafanimada iyo faqriga. Carruurta naafada ahi waxay u badan yihiin kuwo aan helin baadhis caafimaad ee cudurrada guud to taasoo ay sabab u tahay sida ay shaqaalaha caafimaadka ugu adag tahay inay si habboon u waraysan karaan dadka noocyada naafonimada eek ala duwan leh.

Sida kor lagu xusayna, xarumo badan oo caafimaad iyo cisbitaallo ayaan xitaa meel naafadu ka gashoba aan lahayn, taasoo hor istaagta inay adeegga ka faa'iidaysan karaan. Taas waxaa la mid ah dedaalada caafimaadka ee wacyi-gelinta bulshada ayaanay dadka naafada ahi ka faa'iidaysan Karin badi siiba kuwa aragtida ka naafada ah, kuwa maqalka ka naafada ah iyo kuwa garaadka ka naafada ah maaddaama adeegyadaasi aanay si habboon u gaarsiin in farriimaha caafimaad.

Ujeeddo: Kor u qaadida sidii si loo siman yahay oo bilaa takoorid ah ay dadka naafada ah oo dhammi ugu heli lahaayeen adeeg caafimaad (daryeel caafimaad, daawayn, wacyi-gelin iyo ka-hortagba)

Qodobada Siyaasada:

Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, oo ay is kaashanayaan ururrada naafada iyo Wasaaradda Caafimaadka iyo cid kasta oo adeegyada awood-celinta ku lug leh, waa inay xaqiijisaa in siyaasadaha caafimaadka ee Somaliya iyo barnaamijyada caafimaadkuba ay wax ka qabtaan, muddada gaaban, dhexe iyo muddada dheerba, arrimahan soo socda oo badi layska illaawo :

- Qaybta macluumaad ururintu waa inay bilowdaa soo ururinta iyo fidinta xog faahfaahsan oo ku saabsan caafimaadka dadka leh noocyada kala duwan ee naafonimo
- Barnaamijyada asaasiga ah ee caafimaadka iyo wacyi-gelinta dadweynaha waa in la xoojiyaa, muhiimadana la saara daryeelka hooyada marka ay uurka leedahay iyo umusha kaddiba.
- In la xaqiijiyo in dadka naafada ah, gaar ahaan dhallaanka iyo caruurta, in ay heli karaan daryeel caafimaad oo la mid ah kan ay helaan bulshada inteeda kale
- In la xaqiijiyo in shaqaalaha caafimaadka iyo shaqaalaha ka-dhinac shaqeeya kuwa caafimaadku la siiyo tababar habboon iyo qalaba si ay daryeel caafimaad u siiyaan dadka naafada ah.

- In la xaqiijiyo in dadka naafada ahi ay helaan daaweyn joogto ah iyo dawooyin sidi ay u ilaalin lahaayeen korna ugu qaadi lahaayeen heerka shaqaynta jirkooda
- Barida dadka naafada ah xaladahooda si ay awood ugu helaan inay iyagoo fahamsan qaataan go'aanada ku saabsan caafimaadkooda.
- In Kor loo qaada caafimaad qab dhinaca taranka ee dadka naafada.
- In la xaqiijiyo in warbaahinta iyo qalabka gudbinta macluumaadka caafimaadka ay
- Diyaar ku yihiin farta indhooluhu akhristo (Braille) iyo in la sameeyo turjumaanno isticmaala fara-ku-hadalka dhegooluhu fahmo iyo habab kale oo habboon oo warka lagu gaarsiin karo dadka naafada ahba in la sameeyo
- Waa in heer bulsho kor loogu qaadan nadaafada
- Waa in la kantorolaa dawo dhaqmeedka dhibaatada geysata
- In la xaqiijiyo in dadka naafada ah iyo qoysaskooduba ay ku wacyi gashan yihiin adeegyada caafimaad ee ka jira dalkeenna Somalia.

3.7. Awoodid Isticmaal oo aan Caqabad lahayn (Accesibility)

Inay dadka naafada ahi si habboon uga qayb-qaataan nolosha bulshada waxay si weyn ugu xiran tahay inuu deegaanku noqdo mid aan caqabad lahayn iyo inay warbaahinta iyo xogta helaan. In ku dhow gebi ahaan dhismayaasha danta-guud waa qaar loogu talo-galay keliya inay isticmaalaan dadka aan naafada ahayni. Jaranjarrooyinka, albaabada cidhiidhiga ah ee dhuuban iyo suuliyadu waa qaar aanay isticmaali Karin dadka naafada ahi badankoodu.

Ujeeddo: in loo abuuro dadka naafada ah deegaan bilaa caqabad ah si ay u isticmaali karaan dhismayaasha danta guud, gaadiidka una heli karan isticmaalka warbaahinta.

Qodobadda Siyaasada:

- Komishanka Qaranka ee Naafadu waa inuu ka hawl-galaa wasaaradaha si loo xaqiijiyo in siyaasadaha iyo barnaamijyda qorshaynta

magaalooyinka, gaadiidka, warbaahinta iyo dhismayaasha dawladdu ay maanka ku hayaan arrimahan soo socda ee sahlaya in naafadu isticmaali karto adeegyadaas:

- Dhismayaasha danta-guud iyo adeega gaadiidka oo ay ku jiraan wadooyinka iyo jidadka, eerboodhada, noocyada gaadiidka (basaska, diyaaradaha iyo gaadiidka badda), garoomada ciyaaraha, fagaarayaasha iwm. Waxaa laga dhigi doonaa qaar naafadu isticmaali karaan oo bilaa caqabad ah.

- Isticmaalka fara-ku hadalka dhegoolayaashu , farta indhoolayaashu akhriyi karaan, iyo qaababka kale ee war isu tebinta ayaa lagu dari doonaa fahmaan ayaa lagu dhiirri gelin doonaa dhammaan hawlaha dawliga ah in lagu daro iyo weliba ololayaasha sida kuwa doorashada iyo warbaahintaba.;

- Is bedel ayaa lagu samayn doonaa manhajyada kuwa naqshadaha dhismaha sameeya iyo injineernimada iyadoo lagu dari doono arrimaha ay ka mid yihiin in dhismayaasha laga dhigo qaar bilaa caqabad ah. Sidoo kale tababar gudaha ah ayaa laga siin doonaa naqshadeeyayaasha guryaha dawladda iyo injineerradaba xagga dhismayaaasha bilaa caqabadda ah.
- Baahiyaha war-isu-gudbineed (communication) ee dadka naafada ah waa in loo fuliyaa iyadoo laga dhigaayo adeegyada warbaahinta iyo dokumentiyada dawladda qaar ay naafadu isticmaali karaan. Farta indhoolayaasha, adeegga cajaladaha, daabacaadda Farta waaweyn iyo farsamooyin kale ee ku habboon ayaa la isticmaali doonaa si xog loo siiyo dadka aragga ka naafada ah.
- Dhamaan dhismaayasha danta guud loo isticmaalo, waa in la baadhaa oo la hubiyaa inay naafadu isticmaali karto. Waxaa jiri karta baahi loo qabo in la abuuro khubaro la aqoonsan yahay oo baadha in dhismayaashu ay yihiin kuwa naafadu isticmaali karto oo shaqadooda la isticmaali karo.
- Shuruuc dhammaystiran oo dhismayaasha iyo fagaarayaasha istandarro u yaal ayaa la ansixin doonnaa waxaanna la xaqiijin doonaa in deegaanka dhisani uu noqdo mid ka xor ah wax caqabad ku ah naafada

- Dadaal waa in laga sameeya si loo xaqiijiyo in sharciga dhismayaasha iyo dhulka bannaan ay u hoggaansamaan shirkadaha dhismaha, dawladaha hoose iyo Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta ee dalku. Maamuladani waa in ay xaqiijiyaan in dhismaayasha cusub ee dawladda laga dhigo caqabad la'aan
- Dawladdu waa inay ka xaqiijisaa in wershadaha la sameynaayo, xafiisyada, adeegyada danta-guud ee dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahayba ay noqdaan goobo shaqo oo ku habboon naafada goobohooda ka shaqaysa. Shuruuc badbaado oo shilalka shaqo lagaga hortago ayaa la samayn doonaa oo la fulin doonaa si adag.
- Qaabka baananka ee dawlada iyo kuwa madaxbanaanba waxaa lagu dhirigelin doonaa inay adeegyadooda naafadu isticmaali karto.

3.8. Tababarrada iyo shaqaaleynta

Awooda shakhsiga si u shaqeeyo uguna noolaado nolol madaxbanaan waa arrin sharaftii qofka muujinaysa. Bulshadeenu qofka shaqayn kara waxay u aragtaa inuu jir ahaan si buuxda u bed-qabo. Naafada waxaa loo arka bila hawlkar iyo badanka dadka naafada oo isku arka sidaa si la mid ah. Taas midheheedu waxay noqotay sida ay naafada ugu adag tahay inay shaqo helaan. Balse dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin inay shaqo helaan oo ay fursadaha shaqo ula sinnaadaan dadka kale xagga suuqa- shaqo qorista.

Dawladda, kuwa ka shaqeeya fursadaha shaqo abuurka, kuwa tababarrada bixiya iyo shaqo bixiyayaashu waa inay door ka qaataan sidii loo samay lahaa barnaamijyo iyo siyaasado wax ka qabta xagga fursado u sinnaanta oo weliba si weliba ay fursado gaar ah siiyaan dadka naafada ah si dhaqaalahoodu kor ugu soo qaado oo dadka naafada ahina uga dhex muuqdaan shaqooyinka.

Tababarada shaqada iyo arrimaha shaqaleynta waa in laga muujiya qoraalada, ka qaybgal dhameystirana ay ku yeeshan dadka naafadi noloshada bulshada iyo heer qaranba.

Ujeeddo: Kor u qaadista sidii dadka naafada ahi si siman ugu heli lahaayeen fursadaha shaqo iyo kuwa tababar marka loo eega dadka aan naafada ahayn.

Qodobadda Siyaasada:

- Is bedel waa in la dhexgeliya sharciga shaqalaha ee Soomaliya si loogu daro wax-ka-beddel muhiim ah oo ku saabsan dhinaca shaqaleynta dadka naafada
- Dawladdu waa inay ka hawl-gashaa sidii loo samayn lahaa qaanuun xaqiijinaya sidii dadka naafada ahi ugu qayb-qaadan lahaayeen fursadaha guud ee shaqo iyo tababar oo meesha looga saari lahaa caqabadaha sharci ee ka hor imanaya ka qayb-qaadashada naafada ee suuqa shaqada isla markaana difaacaya xuquuqda shaqo-helid ee dadka naafada ah.
- Siyaasadaha iyo barnaamijyada hadda jira ee ku saabsan tababarrada xirfad abuurka, shaqada iyo soo saarka dakhli soo saarka ee dhallinyarada iyo qaan-gaadhka naafada ah waa in laga dhigaa qaar loo dhan yahay oo dhammaan dadka leh noocyada naafonimo ee kala duwani ka faa'iidaystaan, taas oo ay ka hawlgalkeeda leedahay wasaaradda waxbarashada siiba waaxda waxbarashada xirfadda, iyo ciddii kale ee door ku lehba.
- Tababbarro xirfad abuur iyo barnaamijyo dakhli-abuur oo loo dhan yahay ayaa laga dhigi doonaa qaar si siman ay uga wada faa'iideystaan dhammaan dadka leh noocyada naafonimo iyadoo loo maraayo qorshayn horumarineed oo ay hagayso wasaaradda waxbarashadu iyadoo la kaashanaysa wasaaradaha kale iyo hay'adaha mucaawimada ee door ku leh
- Waxa loo haynayaa ugu yaraan 5% ee shaqooyinka oo gaar loogu qabto shaqaaleynta dadka naafada ah ee aqoonta leh ee hay'daha dawladda Somalialnd iyo shirkadaha gaarka loo leeyah ee shaqa-qorista.
- Gaar wax u siin naafada ku wajahan oo fursadaha loogula simaayo shaqaalaha naafada ah kuwa aan waa inaan loo arkin takoor lagu takorayo shaqalaha aan naafada aheyn.
- Wasaaradaha ku shaqada leh waa in ay si dhow isugu xirmaan ururada aan dawliga aheyn iyo shirkada gaarka loo leeyahay si loo kordhiyo

hawl fududeynta dadka naafada loo fududeeyo inay tababarrada guud iyo fursadaha shaqoba ka qayb galaan.

- Baahida gaarka ee Waxabarashada iyo tababarada shaqooyinka waa in lagu dara horumarinta caawimooyinka barnamijyada Wasaaradda Waxbarashada si loogu xiro Wasaaradaha kale.
- Sameynta 2% xaladda shaqaleynta in laga asaaso Dawladda Soomaliya ayado la eegayo khibrada dadka naafada
- Siyaasada tababarada shaqada dhalinyarada iyo waayeelka ee dadka naafada waa in lagu horumariya Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Wasaaradda Waxbarashada;
- Waa in kor loo qaado in dadka naafada ahi ay shaqo u gaar ah abuuran karaan iyadoo loo isticmaalyo waxbarashada xirfad abuurka iyo tababarrada maamulka.

3.9. Tixgelinta Baahiyaha Dhinac-walba gala ee kooxaha xaalad nuglaansho ku jira (Cross-cutting considerations for groups in vulnerable situations)

Siyaasaddan waxay tixgelin gaar ah siinaysaa kooxaha soo socda oo muhiimad gaar ah leh oo ay tahay in la siiyo tixgelin gaar ah marka adeegyada kala duwan la bixinaayo iyadoo laga shidaal qaadanaaya talo-bixinahan soo socda:

- ### 3.9.1. Haweenka Naafada ah:

Haweenka naafada waxaa la kulmaan xadguduyada ay la kulmaan haweenka aan naafada ahayniba. Waxa taas u sii dheer, dumarka naafadi waxay la kulmaan takooris ka badan tan ay la kulmaan dumarka kale taasoo ay sabab u tahay awood la’aantooda in wixii dumar laga filanaayey ee bulshadu ay ka filayso in dumarku qabtaan aanay gaadhsanayn heerkoodu, taasoo bulshadu dejisatay. Sidaas daraadeed barnaamijyada ilaalinta, kuwa shaqo qorista, iyo kuwa waxbarashadu waa inay xoogga saaraan sidii loo xaqiijin lahaa la socod iyo iyo wax laga qabto xaaladdooda, iyo wixii goldaloolooyin ah eek u yimid naafanimada iyo haween ahaan sida loo arko.

Meelaha goldaloolada naafanimada iyo haween ahaan waa in wax laga qabtaa si looga gudbo xaaladahan soo socda: In dumarka naafada ahi u nuglaadaan faqri iyo rajo-xumo, nafaqo darro, wax-akhris-qoris la'aan, iyo in la aqoonsado doorkooda haween ahaan ee laamanaha iyo in ay helaan xaq la mid ah dadka kale xagga caafimaadka taranka.

Ujeeddo: Dumarka naafada ahi waa inay helaan fursado xagga shaqada iyo xagga ilaalinta inaan xuquuqdooda lagu tumanin sida la mid ah dumarka aan naafada ahayn

Qodobada Siyaasada:

Qaranka Somalia wuxuu aqoonsaday in haweenka iyo hablaha naafada ahi ay la kulmaaan faquuqid fara badan, sidaas daraadeedna waxa la qaadi doonaa tallaabooyin lagu xaqiijinaayo sidii ay u heli lahaayeen sidii si buuxda oo la mid ah dadka kale ay ugu heli lahaayeen xuquudooda iyo xorriyaadkooda. Tallaabooyinka soo socda ayay siyaasaddani u qaadi doontaa si taas loo gaadho:

Waa in la xaqiijiyo in siyaasadaha hadda jira iyo barnaamijyada ee sinaanta lammaanaha (gender) iyo faquuqid la'aantu ay ku xisaabtamaan waxyaalahan:

In daraasad lagu sameeya xiriirka ka dhexeeya naafanimada iyo lammaanaha oo la ogaado sida ay saamayn ugu leedahay dumarka Somalia ee naafada ah

In laga ilaaliyo in la gumaysto, dayaca, in lagu tacadiyo iyo nooc kasta oo ka mid ah dilista dumarka naafada;

Dhiirrigelinta in dumarka naafada ah lagu daro barnaamijyada guud ee horumarinta iyo awoodsiinta dumarka

Ku jiheynta barnaamijyada wacyigelinta ah xagga dumarka naafada iyo xaaladohooda u gaarka ah sida xaqa ay guur u leeyihiin.

Samaynta barnaamijyo gaar ah oo waxbarasho, shaqaaleynta iyo in loo qabto adeegyada awood celinta (rehabilitation) ee dumarka naafada ah iyadoo laga

eegaayo baahiyohooda u gaarka ah, lana xaqiijinaayo in dumarka naafada ahi uga faa'iideystaan sida ragga iyo dumarka aan naafada ahayn.

In loo raadiyo taageero dhaqaale oo dumarka naafada ee carruurta leh lagaga taageero sidii ay u korsan lahaayeen caruurtooda.

- **3.9.2. Carruurta Naafada:**

Carruurta naafadi waa kooxda ugu nugul ee u baahan fiiro-gaar ah in loo yeesho. Dawladda Somalia waxay qaadi doontaa tallaabooyin lagu xaqiijinaayo in carruurta naafada ahi ay u helaan xuquudooda iyo xorriyaadkooda aasaasiga ah sida carruurta kale. Waxay u baahan yihiin inay helaan adeegyada dhallaanka oo ay ku jiraan in goor hore la ogaado nooca naafanimadooda oo la garto.

Waxay u baahan yihiin inay heli karaan adeegyada hore-wax-ugu qabashada (early intervention services) oo ay ka mid tahay in xaaladdooda naafo hore loo ogaado loona garto.

Ujeeddo: Carruurta naafada ah waa in laga ilaaliyaa in xuquuqdooda lagu xadgudbo oo ay helaan adeeg awood-celineed oo habboon si loo xaqiijiyo inay fursad la siman carruurta kale u helaan waxbarashada iyo nolosha qoyska si ay uga qayb qaataan.

Qodobada Siyaasada:

Tallaabooyinka soo socda ee wax qabad ayaa la fulin doonaa:

Fududaynta iyo dhiirrigelinta sidii loo siin lahaa hore-wax-ugu qabasho, madadaalin iyo fursadaha ciyaareed ee carruurta naafada.

Xaqiijinta xaqa daryeel, ilaalineed iyo amaanimmo ee carruurta naafada;

- Xaqiijinta xaqa korriin sharaf leh iyo sinaanta ayadoo la abuurayo deegaanka carruurtu ay ka heli karaan xaqooda, ku farxi karaan fursado loo siman yahay iyo ka qaybgalka dhamaystiran ee dhinacyo kala duwan.

-
- Xaqiijinta in lagu daro carruurta naafada ah xagga hawlaha waxbarashada, caafimaadka, tababarrada xirfad abuurka oo ay la socdaan adeegyada dib-u-dhaqan celinta gaarka ah ee carruurta naafada.
-
- Xaqiijinta xaqa korriinka iyo sidoo kale in la aqoonsado baahida gaarka ah iyo daryeel, xanaaneynta iyo ilaalinta carruurta leh naafonimo culus.
-
- Xaqiijinta in carruurta fikirkooda la tixgeliyo mar kasta oo ay cabbiri karaan oo ay suurtogal tahay

3.9.3. Dadka da'da ah ee Naafada:

Inuu qof naafo noqdo waxaa sii kordhiya da'da ama gabowga. Jiritaan la'aanta adeeg caafimaad oo guryaha gaadha iyo adeegyada bulshada, gaar ahaan meelaha miyiga ah, waxa micneheedu yahay dadka da'da ah ee naafada ahi waxay badi ku nool yihiin qolalka dambe ee guryaha carruurtooda. Adeegga gaadiidka dadweynaha ee aan la wada isticmaali Karin, iyo caqabadaha ay leeyihiin deegaanka dhisani waxay keenaan in adeegyo wixii loo qoondeeyey dadka gaboobay ay gaari waayaan dadka naafada ah ee da'da ah. Taasi waxay sii kordhisaa goonni u faquuqa iyo niyad xumada ay kooxdani la kulmaan.

Ujeeddo: Dadka da'da ah ee naafada ahi waa inay helaan xuquuqdooda si la siman dadka kale, isla markaasna ay helaan adeegyo habboon iyo daryeel, oo laga ilaaliyaa in xuquuqdooda lagu xadgudbo.

Qodobada siyaasada:

Promote support of home based care to families and households with elderly persons and provisions for those elderly persons without families or households to look after them

Xaqiijinta in dadka gaboobay ee naafada ah la siiyo mudnaanta dib-u-awood celinta iyo barnaamijyada horumarineedba, iyo in xog faahfaahsan laga soo ururiyo adeegyada si loola socda sida ay adeegyada u helaan

Kor in loo qaado adeegyo dadka meeshooda ku gaadha iyo adeegyada awood-celinta (rehabilitation) waana in daryeel la siiyo dadka da'da ah ee aan lahayn ehel in la xannaaneeyo

3.9.4. Dadka leh naafanimada kala duwan:

Dadka leh tirayooinka kala duwan ee nafanimo waxay tirsanayaan wali dhibaatooyin badan. Bulshada waxay gabi ahaan aanay u diyaargaroobin sidii ay bulshada u dhexgeli lahaayeen. Qoysaskooduna waxay la kulmaan dhibaatooyin sidii u siin lahaayeen daryeel tayo leh oo ku filan iyo taageero maalin walba ah. iyo reerahooduna aanay si caadiya u awoodin inay si wanaagsan u xanaaneyaan. Dadka leh naafanimada kala duwan waxay u baahan yihiin xanaaneyn gaar ah, daaweyn iyo bay'ad deggan iyo adeegyo kaladuwan oo gaar ah oo takhasus ah.

Ujeeddo: Xaqiijinta in dadka ay ku kulmeen dhowr naafonimo ama naafonimo culus iyo mid dhexdhexaad ahi ay helaan fursado la mid ah dadka kale iyo in qoysaskoodu taageero helaan si daryeel ku filan oo tayo leh loo siiyo.

Qodobada Siyaasadda:

- Waa in la xaqiijiyaa in barnaamijyada mustaqbalka ee horumarka iyo ilaalinta bulshada iyo barnaamijyada daryeelku ay xoogga saran sidii wax loola qaban lahaa guryaha ay joogaan dad leh dhowr naafo iyo kuwa leh naafonimo culus, oo u badan inay faqri ku jiraan.
- In la xaqiijiyo in adeeg bixiyayaasha caafimaadku u diyaarsan yihiin sidii ay u caawin lahaayeen dadka leh dhowr naafonimo ama naafonimo culus
- In la xaqiijiyo in shaqaalaha caafimaadka iyo kuwa awood-celinta la siiyo tababarro ku filan si ay u caawiyaan dadka leh dhowr naafonimo ama naafonimo culus iyo qoysaskooda
- Waxa tix-gelin la siin doonaa sidii loo aasaasi lahaa hab bulshada dhexdeeda ah oo daryeela dadka da'da ah iyo dadka leh dhowr naafonimo ee aan haysanin wax ehel ah oo daryeela iyo sidii looga hortegi lahaa in sidaasi dhacdo iyadoo ehelka la siinaayo taageero degdeg ah si ay daryeel u siiyaan dadkaas naafanimada badan leh ama culus.

3.10. HIV/AIDS IYO NAAFANIMO

Dadka leh naafanimada kala duwan waxay u baahan yihiin galmo sida dadka aan naafada aheyn si la mid ah isla marka waxaa ku dhici kara cudur. Sidaa awgeed ololaha wacyigelinta ee ka dhanka ah xawliga fidista cudurrada laga saaro dadka naafada. Dadka naafada badankooda waa faqirin iyo aqoon yar oo ay u leeyihiin hawlaha warbaahinta ee HIV/AIDS. Oloolaha caadiga ee ka dhanka aha cudurada maaha kuwo saaxiib la ah naafada, tusaale ahaan; warbaahinta qoraalka ah si caadiya ayaa loo dabacay iyo sida aanay u akhrisan karin kuwa indholayaashi. Sido kale warbaahinta hadalki malaha hab loogu macneeyo dhegolayaasha si ay uga fa'iideystan maqaalka aanay maqleen.

Cawimo la'aan farsamo oo guud ayaa ku ah dhibaato badnaan dadka naafada iyo yareenaysa naasiibka ay u heli lahaayeen hawlaha warbaahinta ee HIV/AIDSka iyo in ay si hufan u heelan infakshan aqoon la'aan darteed.

Ujeeddo: Waa in la xaqiijiyaa in dedaalka iyo barnaamijyada lagaga hortegaayo HIV iyo AIDS ay noqdaan qaar naafada gaadha oo ay ka faa'iidaysan karaan

Qodobada Siyaasada:

Waa in la xaqiijiyaa in dadka naafada ah ay qayb ka noqdaan waxqabadka qaranka iyo siyaasadda HIV/AIDS iyo caafimaadka tarankaba.

Waa in la xaqiijiyaa in is-baadhidda iyo barnaamijyada dawaynta iyo goobaha ka shaqeeyaba ay noqdaan qaar naafadu isticmaali karto iyadoo loo maraayo tababbarro laga siiyo shaqaalaha naafanimada iyo sinaanta.

Qaab waa in loo hela lagu rumeeyo wacyigelinta barnaamijyada HIV/AIDSka ee jira ay u gaadhaan dadka naafada.

3.11. Xuquuqda Bini'adamka iyo ilaalinta sharciga

Hordhac

Dadka naafada marka lagu daro kuwa leh dhawacyada wakhtiyada dhaadheer, tusaale ahaan; muuq ahaan, maskax-xanuun bulshadeed, maskax wanaag aanu haddana ku hawlaneyn arrimaha bulshada waayo sababa kala duwan awgeed, sida dabaceda, luqada, dabaqyada iyo sharciyada oo ka celinaya dadka naafada inay ku darsamaan bulshada inteeda kale.

Xuquuqda bini adamku waa xaqa qofka ee cadiga waayo isaga/iyada waa qof bini adaam ah. Qeexitan kale oo xuquuqda bin adamka waxaa weeye baahiyaha seeska u ah in qofka bini adamku yeesho nolol iyo sharaf.

Waxaa muhiim ah in la aqoonsado in bulshada naafada ahi ku sii kordhayso si weyn takooridu dhanka mudaninta intooda kale. Dadka naafadi khibrad ayey heleen, walina heleeyaan, cadadka heerka ay dibada ku sii noqonayaana ay kordhayso kana sii baxayaan bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasada deegaanka. Dalabkan gaarka ahi wuxuu ku jiheysan yahay in khaladka hore iyo sinaan la'aan imika.

Komishanka Xuquuqal Insaanka ee Soomaliya (SNHRC) wuxuu ka ciyaaraa door muhiim ah ilaalinta xuquuqda bini'aadamka ee dadka naafada ah iyo isku xidhka dhanka ka qaybgalayaasha kale ee doorka ku leh.

Ujeeddo: Sidii loo xaqiijin lahaa in dadka naafada ahi helaan xuquuq isku mid ah miyo iyo magaaloba isla markaasna la ilaaliyo oo la difaaco inaan lagula kicin xad-gudub xuquuqda naafada .

Qodobada siyaasada:

- Sida lagu xusay heshiiska caalamiga ah ee xaqa dadka naafada, baahida naafada waxa laga dhigi doonaa mid xuquuqul insaanka ku qotonta oo aan ahayn u dewerid
- Xaqiijin in heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda dadka naafada ah la saxeexo oo la qaato oo ay ansixiso dawladda Somalia laysku raacay iyo in ay fuliso Dawladda Somalia.
- Xaqiijin in xuquuqda bini'aadamka dadka naafada lagu daray siyaasadaha oo dhan iyo barnaamijyada dhammaan.
- Xaqiijin in xuquuqda dadka naafada ahi qayb ka noqddan siyaadaha iyo barnaamijyada jira
- Xaqiijin in dadka naafadu ay leeyihiin xaq la mid ah dadka kale oo dhan;
- In Kor loo qaado barnaamijyada tababarada caawinaya dadku in ay ogaadaan xuquuqda dadka naafada.
- Waa in talaabo laga qaado oo la joojiyo shakhsiyaadka, ururrada ama bacyaamushtarigu in ay takorid sameeyaan ku salaysan qofka naafanimadiisa awgeed.
- Waa in tababarro la siiyaa dadka u shaqeeya naafada ku saabsan xuquuqda uu qoraayo heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda naafadu si ay naafada ugu adeegaan si hufan oo fiican
- Waa in la xaqiijiyaa tallaabooyin ay dadka naafada ahi ku helayaan xaqooda muwaadin ahaan sida muwaadiniinta kaleba oo ay helaan ka qayb-qaadasho bulsho (Doorashooyinka, in loo codeeyo iwm)
- Waa in la xaqiijiyaa in shaqaalaha garsoorka iyo haya'daha garsoorka la siiyo tababarro naafada ku saabsan iyo sidii baahiyahooda garsoorku ugu xisaabtami lahaa.
- In la siiyo taageero sharci si ay dadka naafada ahi uga faa'iidaysan karaan caddaaladda , siiba naafada aan iska bixin Karin kharashka.

3.12. URURADA DADKA NAAFADA IYO URRURADA AAN DAWLIGA AHAYN

3.12.1. Golaha Naafada Qaranka Soomaaliyeed (GNQS)

Golaha Naafada Qaranka Soomaaliyeed wakhti xadiirka waa Daladda Guud ee Wadanka kuna jiraan dhammaan ururada Naafada Qaranka Somalia. Waa goobaha qaranka ee badanka Ururada Qaranka ee dadka Nafadu ay ka diwaangashan yihiin iyo adeega ka helaan, isugana yimaadan si ay u xaliyaan una horumariyaan aragtida la sinaanta fursadaha ee ay leeyihiin dadka naafadu. Cadad yar oo laftooda ka mid ah ayaa hela taageerada dawladda..

Golaha Naafada Qaranka Soomaaliyeed, waa xoog muhiim ah oo bulshada ka mid ah. Waxay metelayaan ururada dhisan iyo guud ahaan dadka naafada si ay rayigooda ay u baahan yihiin u dhiibtan iyo soo bandhigista horumarka mustaqbalkooda.

Ujeeddo: In la xoojiyo awoodda ururrada Naafaa oo laga taageero sidii codkooda loo midayn lahaa

Qodobada siyaasada:

- Dhammaan cid kasta door ku lihi waa inay xaqiijisaa in ururrada iyo dadka naafada ah lagala tashada arrimaha iyaga khuseeya ee raad ku leh
- Dawladdu waxay dhiirri-gelinaysaa in ururrada naafado ay xuquuqdooda u doodaan oo ay is metelaan dhamman arrimaha oo dhan
- Dawladdu waa inay dhiirrigelisa samaynta ururrada naafada oo ay wanaajisaa baya’d ay ku shaqayn karaan.
- Dawladdu waa inay u ogolaata ururada dadka naafada inay ka qaybgalaan si firfircoon dhaqaale abuuris ay ku sameeyan horumarintooda.

3.12.2.Horumarinta Ururada Naafada u adeega

Siyaasada Qaranku waxay aqoonsan tahay Ururrada aan dawliga aheyni inay aad muhiim u yihiin oo ay bixiyaan adeegyo ay dadku kharash ahaan awoodi karaan, isla markaasna dhammaystir u ah dedaalka dawladda wixii ka dhiman. Ururrada aan dawliga aheyni waa kuwo shaqo fiican oo soo kobcaaya. Waxay ciyaaraan door muhiim ah iyagoo siiya adeegyo ay u baahan yihiin dadka naafada ahi. Qaar ka mid ah waxay sidoo kale qabtaan hawlo lagu kobcinaayo oo lagu tababaraayo shaqaalaha iyo hawlo xagga cilmi-baadhista ah.

Dawladdu waxay si firfircoon ugu qayb-gelinaysay ururradaas hawlaha sameynta siyaasadda, qorshaynta, fulinta iyo dabagalka waxaanay raadinaysa talo-bixintooda dhinaca arrimo kala duwan oo khuseeya dadka naafada ah.

Qodobada siyaasada:

- Diwaanka ururradda ka shaqeeya arrimaha naafada ayaa la samayn doonaa iyadoo si habaysan loogu muujin doono gobolada ay ka shaqeeyaan iyo hawlaha ugu waaweyn ee urur waliba wax ka qabto
- Xidhidhka ka dhaxeeyaa uruurada maxaliga waxa ay kur u qadayaan arrimahaa nafaada ee qorshaaynta, sameeynta iyo fulinta siyaasada.
- Wada shaqeynta ururrada ayaa la xoojin doonaa ee khuseeya arrimaha kala duwan ee naafada dhinaca qorsheynta, samaynta siyaasadda iyo fulinta..
- Isku xidhka iyo xog-isweydaarsashada iyo ka-wada-faa’iideysashada shaqooyinka qolo si fiican u qabteen ayaa la dhiirri-gelin doonaa lana fududayn doonaa
- Waxa ka jira isku-dheeli tir la’aan gobolada dhinaca horumarinta ururrada. Tallaabooyin ayaa laga qaadi doona lagu dhiirri galinaayo laguna door bidaayo ururrada ka hawl-gala meelaha aan hore looga hawl-gelin iyo meelaha ay adag tahay gaaridoodu.ururrada cusubna waxa lagu dhiirri-gelin doonaa inay mashaariicdooda geeyaan meelahaas aan laga hawl-gelin.
- Hayad’aha aan dawliga ahayn waxa lagu dhiirri gelin doonaa inay sameeyaan oo ay ku dhaqmaan qawaaniin, iyo nidaam haga iyo wixii aan habboonayn shuruuc sheegaysa oo joojinaysa inaan lagu dhaqmin (ethics)

- Wada shaqaynta dawladda iyo hay'adaha waxa hagi doonta oo kor loogu qaadi doonaa shuruuc la fududeeyey oo ku saabsan in wax waliba muuqdaan oon madmadow jirin, iyo wada xisaabtan.
- Ururrada maxaliga ah waxa lagu dhiirri galin doonaa si ay iskood isku ababuulaan iyo khayraadkooda si ay uu yareeyaan ku tiirsanaanta caawimada deeq-bixiyaasha caalamiga ah iyo sidii ay kor ugu qadi lahaayin helista dhinaca malgalinta ee qaybaha ay ka hawl-galaan.
- Dawladu waxa ay siin doontaa maalgalin caawimo ah qar ka mid ah kuwa ugu caansan ee ururrada naafada u shaqeeya ee qaranka markii ay suurtogal noqotoba.
- Ururrada maxaliga ah waa in lagu tababara abaabbuulka khayraadkooda si ay iskugu filaadaan.

CUTUBKA4: MASUULIYADDA IYO MASUULIYADAHA FULINTA SIYAASADDAN EE KA QAYB QAATAYAASHA

Dadka naafada ah waxa ay xaq iyo sinnaanta fursadaha u leeyihiin fursadaha horumariinta iyo helitaanka adeegyo la mid ah kuwa ay helaan dadka aan nafaada ahayn. Doorkooda ay kaga qaybqaadanayaan nolosha bulshada waa in hadafkiisu ahaadaa sidii loo yarayn lahaa ama loo tirtiri lahaa inay cid kale ku tiirsanaadaan iyagoo muwaadiniin ah.

Iyadoo maskaxda lagu hayo in dawlada wax haynteedu iska kooban tahay, guusha siyaasadan fulinteeda laga gaari karaa waxa ay ku xiran tahay inay door firfircoon ka qaataan dhammaan ciddii qayb-ka-ahi.

Si siyaasaddan fulinteeda loogu jiheeyo horumanrinta iyo kor-u qaadidda adeegyada dadka naafaha ahi, waa kuwan masuuliyadaha kuwa ugu muhiimsan ee door ku leh siyaasaddani:

Siyaasada qaranka ee naafada Somalia waxaa si wanaagsan loo fulin karaa marka lagu dhexdaro siyaasadaha dawladda iyo barnaamijyadeeda hoos yimaada Barnaamijka Guud ee Horumarinta Qaranka (The National Development Framework)

4.1 Dawladda dhexe (WASAARADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA IYO WASAARADAHA KALE)

- In la xaqiijiyo in wasaaradda naafada qaabilsan ay tahay, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada WSH&AB, oo ay is kaashanayaan Wasaaradaha kale ee furaha u ah hawshan, inay ay sameeyaan qorshe hawl-fulineed si arrimaha muhiimadda ah ee siyaasaddan loo fuliyo shanta sannadood ee soo socda iyo in si joogta ah ay daba-gal, wax-ka-beddel iyo fulin loo sameeyo
- Inay daba-gal ku samayso tayada, sidii arrimaha naafada loogu dari lahaa barnaamijyada guud iyo adeegyada u khaaska ah naafada iyo sidii kharash loogu qoondayn lahaaba
- In la daraasadeeyo qawaaniinta khusaysa si naafadu u helaan horumarin la siman dadka kale
- In la xaqiijiyo in naafadu fursado la siman dadka kale , inay bulshada qayb ka noqdaan nolol maalmeedka iyo inay arrimaha bulshada iyo siyaasadda Somalia ka qayb qaataan
- In la dhiirri geliyo in dawladaha hoose u aqoonsadaan naafada ka qayb-qaadasho;
- In la xaqiijiyo in Haya'do ku filan iyo ururrada horumarinta bulshada ee doorka ku lihiba ay siyaasaddan taageeraan oo ay diyaariyaan wixii kheyraad loo baahnaa (aqoonta, kharashka, iyo haya'ado ahaanba) si naafadu si siman ugaga qayb qaadato adeegyada jira ee guud iyo kuwa u khaaska ahba

4.2. Dallada Naafada ee Qaranka

Shaqooyinka Dallada naafada qaranka waxaa ka mid ah:

- Fududaynta, xiriirinta iyo dabagalka, fidinta wixii laga qabtay iyo waxa ay xambaarsan tahay iyo fulinta siyaasadan naafada ee qaranka iyo xog-warrankeeda joogtada ah (iyadoo iskaashi dhaw la leh Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada – eeg kor, qorshe hawl-fulineedka)

- Isku xidhka dawladda iyo bulshada rayidka ah iyadoo loo maraayo ururrada naafada ee kala duwan
- In hab maamul oo isku xidh loo sameeyo arrimaha naafada min qorshayn, fulin iyo daba-gal ee waaxaha kala duwan, iyo talo-bixin la siiyo waaxaha kala duwan ee dawladda xagga arrimaha naafada
- Xaqiijinta Wacyigelinta bulshada, iyo sidoo kale dhisid awoodeed oo ururrada naafada ku hawlan iyo waaxaha dawladda si loo fuliyo siyaasadan;
- Habeynta iyo isku xidhka wacyigelinta barnaamijyada dawladda, ujeedaduna tahay is bedel lagu sameynayo fikirka khaldan ee bulshadu ka qabto naafada, in daraasada lagu sameeyo miisaaniyadda oo loo hubiyo in xoolo ku filan loo qoondeeyey arrimaha naafada, siiba xagga bulsho-dhexgalka iyo awoodsiinta wixii fududaynaya
- Fududaynta sharci samaynta iyo xaqiijinta in shuruucda jirtaa ay yihiin qaar arrimaha naafada aan ka hor imanaynin.
- Produce biannual reports on disability covering issues such as achievements, challenges, and human rights violations against persons with disabilities.
- Fududaynta iyo wadista sidii kharash ku filan wasaaradaha kala duwan qaybaha siyaasaddani ugu qoondayn lahaayeen si lagu taageero fulinta siyaasaddan
- Soo saaridda Warbixin sannadkiiba laba-jeer ku saabsan arrimaha naafada Warbixintaas oo daboolaysa arrimaha ay ka mid yihiin wixii siyaasaddan ka fulay, caqabadaha lala kulmay, xadgudubyada xuquuqda naafada ee dhacay iwm.

4.3. Dawladaha Hoose (dawladaha hoose iyo xafiisyada dawladda ee goboladda):

- Inay dadka naafada ka qaybgeliyaan habka maamulkooda, go’aan qaadashada iyo naqshadaynta barnaamijyada
- Inay xaqjijiyaan in qorshaha horumarineed ee deegaankoodu iyo hawlaha socda ee ay masuulka ka yihiin ay siyaasadan qaybeheeda qorshaha ku darsadeen oo ay naafadana ku dareen waxqabadkooda

- Inay xaqiijiyaan in adeeg bixiyayaal ku filani ay jiraan aaggooda iyo in dadka naafada ah ay hleaan u gudbin adeegyada iyaga khaaska u ah
- Inay siiyaan ilaalin dadka naafada ah xagga sharciga hortiisa oo ka ilaaliyaan in xuquuqdooda lagu tuntay sida ku cad siyaasaddan
- In la xaqiijiyo in adeegyada aasaasiga ah ee sharciga ay helaan si joogto ah si loo fuliyo waxyaalaha siyaasaddani ka hadlaysao
- Waa in laga war hayo oo kor loo qaado iskaashiga hay'adaha aan dawliga ahayn ee bixiya adeegyada iyo barnaamijyada guud iyo kuw khaaska u ah naafada iyo in isku-xidhkooda laga shaqeeyo
- Inay ka qayb-qataan daba-galka siyaasaddana siday u fuli lahayd marka la joogo heerka deegaankooda.

4.4. Qoysaska/tuulooyinka/ Bulshada

- Iyagoo kaashanaya dawladaha hoose iyo ururada aan dawliga aheyn, qoysaska/ururrada heer tuulo waa inay u doodaan sidii siyaasaddan naafada loo fulin lahaa abuur.
- Waa inay ku wacyi gashanaadaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda siyaasaddan ku jira
- Waa inay ilaaliyaan dadka naafada ah sida ku cad siyaaddan.
- Iyagoo kaashanaya dawladaha hoose iyo haya'daha aan dawliga ahayn, qoysaska/guddiyada heer tuulo waxay qorshayn doonaan oo fulin doonaan tallaabooyin heerkooda ah oo naafada bulshada ku daraya kana jawaabaya baahiyoooda

4.5. Ururada aan dawliga aheyn

- Wada shaqeynta maamulada hoose ee ururada aan dawliga aheyn waa inay cadeyaan dadka naafada iyo baahidooda.
- Waa inay sameeyaan caawimo qalab oo ay leeyihiin dadka naafadu si ay ula shaqeeyan maamulada hoose.
- Waa inay u qabtaan dadka naafada ilaalin ka mid ah adeegyada ay bulshada siiyaan

- Iyagoo is kaashanaya dawladaha hoose, ururada aan dawliga aheyn waa inay Wacji geliyaan oo xaqiijiyaan ka qayb-qaadashada naafda iyo qoysaskooda qorshaynta, daba-galka iyo fulinta siyaasadda naafada

Lifaaq 1: Qeexid.

(a) Naafada:

Waayida ama xadidnaanta fursadaha lagaga qayb qaato nolosha caadiga ee bulshada si la siman kuwa kale, kuwaaso ah muuqaal ahaan, maskax ahaan ama arrimaha bulshada.

(b) qofka naafada ah:

B.1.) qeexida hore: qofka ah naafada isaga/iyada wuxuu leeyahay xalaad daweyn oo la og yahay inaanu awoodeyn, si wax uun uga shaqeysiyo waayo xanuunka dhawaaca dartiis.

B.2.) qeexida labaad: qof marka uu naafobo waayo isaga/iyada waxaa loo takoraya caqabadaha haysta dartood, baqdinta, khiyaaliga ama dabacadaha.

Dadka naafada ah (PWDs)

Magaca ***dadka Naafada*** micnihiisu waa dadka ku qiimeysan in maskax ahaan u xanuunsadeen, maqalka xanuunka marka lagu daro, wax maqlid la'aanta, hadal ama luqada xanuun, xanuun muqaal sida indho la'aanta, xalad dhibaato oo shucuurta,(mararka waxaa loo geysta dhibaato), xanuun muqaal, dhawaac maskaxeed, noocya kale oo ah xanuun caafimaad, barasho naafanimo oo gooniya, dhego iyo indho la'aan, ama noocyo naafanimo oo kala duwan, iyo kuma, sababay sidan, waxaa loo baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriirsan.

(c) dib-u-habeyn:

Dadaalo la isu geeyey oo dhinaca caafimaadka, waxbarashada, cilminafsiga iyo shaqada, oo lagu kordhinaayo heerka shaqeynaya ee dadka naafada si ay ogolaadan inay wax qabsadan isaga/iyada, kana qaybqataan nolosha caadiga ah ee bulshada.

(d) Adeegyada Bulshada Dhexdeeda laga fuliy (Community Based Rehabilitation):

Dhamaan heerarka isku xidhka habka iyo qaabdhismeedka lagu kobcinayo tayada nolosha dadka naafada.

(e) Is dhexgalka:

Heerka ka qayb-gelinta iyo aqbalka dadka naafada ee bulshada dhexdeeda.

(g) Sinaanta fursadaha ee dadka naafada:

Sameynta sinaanta fursadaha iyo adeegyada dadka naafada ee la mid ah kuwaa aan nafada aheyn.

(h) shaqada:

Hawl kasta oo sharciya oo u ogolaanaysa qofka naafada nolol madaxbanaan waa inuu hela.

(i) Qalabka Nafaada (Orthopedic appliance):

Qalabka nafada oo tageerayaa dadka nafada ay si ay u sii yaan awoodo

Waxaa diyaariyay:

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada

Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada

Mudane Cabdiwali Ibraahim Sheekh Muudey